# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:08 AM** | **Hansard No.22/10** | **Kal-fadhiga 22aad**

**Fadhiyadii 32 iyo 3aad** | **Taariikhda 8-9/*10/2013***

## *Doodda Miisaaniyada Qaranka ee 2014ka oo socotey 2 maalmood kana qeyb qaateen 13 Mudane.*

1. **Md. Siciid Warsame Ismaaciil:-** Shir-gudoonka iyo xildhibaanada fadhiya ee sharafta leh waxaan ku salaamayaa salaanta islaamka, salaan ka bacdi waxaan horta aan aad hambalyo ugu dirayaa oon bogaadinayaa Wasaarada Maaliyada dedaalkan ay ku keentay miisaaniyada sanadka 2014, mudona ay ka dhiman tahay sanadkii laba bilood.

   Waxaan rabaa inaan faah-faahin ka bixiyo ama aan isyar kor taago meelaha qaarkood miisaaniyda waxaa ka mida meelaha aan anigu yara xiisaynayo in horta siyaasada guud ee miisaaniyadu ay yeelato (target) oo ay leedahay meelo ayna ku qotonto qodobadan aan rabo inaan hoosta ka xariiqo waxaa ka mida maadaama xiligan ay ugu badan tahay tahriibtu in ay miisaaniyadeena ay ku jirto shaqaalayn badan ay (priorityga) noqoto, waxaa kaloo muhiima, maadaama kobocii dhaqaale rabno inaynu korodhino dhaqaale in miisaaniyadu ay ku basegaraysan tahay korodhka ilaha wax soo saarka sida beeraha, xoolaha, kaluumaysiga iyo deegaanka, kuwaas oo aad moodo in marka la eego miisaaniyda qaabkeeda ay yihiin kuwa ugu liita.

   ***Waxaan soo jeedin lahaa:-***

   - Marka la eego 2% loogu talo galay gobolada bari in iyadana iyadoo isku duuban ayay meesha ku jirtaaye in la mashaariceeyo, waxaan soo jeedin lahaa oo kale in miisaaniyada lagu daro number shaqaalayn oo badan maadaama tahriibtu ay badan tahay numberka ardayda soo baxaysaana ay badan tahay oo la filayaa in number badan oo shaqaalayn ah lagu daro.

2. **Md. Aadan X. Diiriye Dirir:-** Bacda salaan, miisaaniyada sanadka waan u ducaynayaa ciddii soo samaysay ee keentay wakhtigii loogu talo galay wakhti ka horeeya, waxaanse ku darsanlahaa aniga oo og aynu isla garano waxaa

weeye Golaha uun uma qabo imika inuu yahay Golaha sharci-dejinta, waxaan aaminsan yahay inuu wax la idhaahdo ama uu yahay Golaha ansixinta, waayo maalin dhawaydna caynkaa idhi golahani wuxuu ku shaqeeyaa Golaha ansixinta inagu wax la inoo keeno uunbaynu ansixinaaye laakiin wax inaga soo baxa ma oo aynu dejino oo umadda u haynaa ma jiro waxaana weeye, markaa waxaynu u dhiganahay gole ansixined

Muhiimadaydu waxaa weeye miisaaniyadaa la inoo keenay anigoo ku dabaqaya distoorkeena qodobka 54aad anoo adeegsanaya faqradiisa 1aad waxay leedahay Goluhu wuxuu awood u leeyahay jidaynta cadaymaha takaaliifta talaabooyinka kale oo kor loogu qaadayo dakhliga wadanka, dakhliguna waa miisaaniyadda ina hortaala, wuxuuna awood u leeyahay aasaasida kaydka dakhliga Somaliland ama kayd kale oo loo qoondeeyo xaalado gaara, habka loo maamulayo, loogu ururinayo iyo habka looga bixinayo waxaasoo dhan ayaynu awood u leenahay, waxaa hoos galaya qodobkaa labadiisaa faqradood waxyaalaha uu ka hadlayo waxaa soo hoos galaya takaaliiftii wadooyinka ee maalintii dhawayd aan is waydiinaynay waxaa soo galaya lacagtii aynu lahayn inagoo Golaha ah aan iska goyno dooddaa aan gacanta ku hayaa waa minuteskii laga ururiyeey ee ka samaysantay takaaliiftii wadooyinka loo samaynayay.

Waxaa dooddaa ka qayb galay 38 xildhibaan 23 ka midi nin waliba siduu doono ha u idhaahdee waxay ka hadleen in lacag la saaro isgaadhsiinta cosmatics waxyaabaha la isku qurxiyo xawaaladaha waxay ka hadleen inaynu inagu lacag iska goyno ayaynyu ka hadalnay oo 23 ka mida 38 qofwalba marka uu hadlayo waxaa uu ka hadlayo hadaanay ka dhab ahayn inuu haystaaba haboon,

Markaa waxaan soo jeedinayaa, wixii halkaa aynu kaga dooddnay, ee 23 xildhibaan ku dooddeen ee ay lahaayeen ha lasaaro isgaadhsiinta, ha lahasaaro cosmatics, hala saaro xawaaladaha iyo inagu aynu iska goyno, waxaa weeye hadii ay yaqiin iyo iimaan inaga oo ku xisaabtamayna maanta jaamacadaha sanadkaa aynu manta joogno ilaa 3200 oo inan ayaa kasoo baxay jaamacadaha Somaliland oo maalin walba maxweynaha iyo madaxeyne ku-xigeenka ama gudoomiyaha Golaha wakiilada ama gudoomiye ku xigeenka Golaha wakiilada Ay ka qayb galaan maxaa ay xafladahooda uga qayb galayaan hadii aynaan dadka waxba u hayn maa aynu albaabada usoo xidhno.

Waxaa ay ku badbaadayaan waxaa weeye inagoo aqoonta alle ina siiyey iyo awooda sharci ee aynu leenahay wixii inamadaasu ay ku shaqo tagi lahaayeen

maantay ina hortaalaaye waa miisaaniyadaase ugu darno, oo meeshii wax looga helayaba miisaaniyada ku kobcino inagoo sharci adeegsanayna oo ilaa 1500 oo qof hadii afar milyan aynu ku darno intaa la leeyahay hala ansixiyo hadii afar milyan ama shan milyan lagu daro waxay shaqo galinaysaa 1500 oo ardey oo soo baxay 1500 oo tarhiibi lahaa markaa anuu doodaydu waxaa weeye miisaaniyadaa iyadoo la ansixinayo wixii suplemntary ah ee aynu ku darayno ee doodeenaa ka soo baxay haday xalaal ahayd waxaa aynu ku doodaynay midaynu iska goyno ha noqoto iyo mid aynu saarno cidkale ha noqotee, waxaa intaa aynu sugayno oo uun wax la inoo keeno oo ansixino, wax inaga soo baxay oo aan umadeena wax ugu darno miisaaniyada halana ansixiyo markaa.

3. **Md. Faarax Maxamed Cabdile: -** Mudanayaal, miisaaniyadan runtii wasiirka iyo wasaaradaba aad baan ugu mahadnaqayaa qodobkaa distoorka ah ee mudaddii distoorku ugu talo galay ay ku keeneen, taa marka laga reebo kolay anigu waxaan u arkaa inay miisaaniyadu dhaliil leedahay sidii horeba u lahaan jirtay iyo qaabkay u qoran tahayba.

   Midka ugu weyn een anigu u is dul taagayaa waxaa weeye, waxaa muhiima in marba wixii muhiimada ah ee sanadkaa ee muhiimada la saaraya in ay miisaaniyda siyaasadeedu ay xambaarsanaanto, Matalan beryahan waxaynu arkaynay sida ka muuqatay amba aynu halkan ku ansixiyey inay dawladu tidhi waxaanu horumarinaynaa waddooyinka, runtii waddooyinka qeybaha horumarinta ah ee wadanka lagu hormarinayaa wax miisaaniyada lagaga soo daray oo cashuurtii aan halkan ku ansixinay aan ahayn ma jirto,

   Taasna waxaan qabaa in aanay ku filnayn oo wax yar iska tahay oo waxaa aynu halkan ka qoondaynay aanay ahayn wax waddo samaynaya hadaan ilaahay meel kale wax inaga siin, markaa siyaasada ayay waajib ku ahayn in wax looga qoondeeyo miisaayinadeena oo korodhna ahayd oo karashaadka badan ee wasaaradaha ku jira ee badankoodu aanay waxba ku cayimeyn, marka laga reebo batroolka, stationary iyo mushaharka shaqaalaha waxaan ahayn in maanta laga dhigo horumarinta wadooyinka aynu maanta subkaa galino oo inagoo xaq u leh dastuurkuna awood inoo siiyay oo miisaaniyada wax ka badali karno, maanta waxaan qabaa qodobkaa wixii kharashaadka lagama maarmaanka wasaaraduhu ka maarmi Karin mooyaane wixii kale ee ay ka maarmi karaan, sida, kharashaadka yaryar iyo gawaadhida loo iibinayo waxaas oo dhan in la galiyo horumarinta waddooyinka baan soo jeedinayaa.

Sababtoo ah hadii aan waddo horeba loo hayn maalin walbana baabuur la iibiyo waa mashaakil, waxaan leehayahay, maanta yaan wasaaradaha baabuur kaliya loo iibinin lacagtaa baabuurada lagu iibinayo ee wasaaradaha ugu jira waa in lagu badalaa horumarinta wadooyinka.

Waxaa kaloo halkan ka muuqata waa Inaganoo waxaynu u baahanay in miisaaniyadii horumarino tii oo wakhtigeedii la keenay, waxaan u arkaa miisaaniyada gudeheeda markaad eegto buuga halkan wasiiruku wuxuu ka iftiimiyey in wasaarad kastaa soo gudbiso miisaaniyada anigu taa ma qabo way soo gudbisaa laakiin sida ay usoo gudbisay lagama yeelo halkaa waxaan soo jeedinayaa in Golaha wakiiladu ama guddiga dhaqaaluhu xogogaal u noqdaan baahida wasaarad walba ka jira waayo waxaa jira wasaarado muhiima miisaaniyadooduna ay aad u yartahay.

Waxaan soo jeedinayaa  maadaama dakhligiina waynaganoo nidhi magaalo hebla intaasaa kasoo xarootay kastam hebla intaasaa kasoo xarootay baa miisaaniyada ku cad sidaa awgeed waa in kharashkana ku cadaato wasaaradaha in la idhaahdo gobol waliba wasaaradiisa intaas ayay leedahay waayo markaad gobolada tagto isuduwayasha wasaaraduhu waa rag meel cidla ah iska fadhiya oo aan awoodin in ay soo kormeeraan wasaaradooda iyo wixii ay ka masuulka yihiin sidaa awged, waxaan soo jeedinayaa kharashaadkoodu inuu jajabnaado oo wixii wadanka kasoo baxaysay hadii halkan caasimada uun ku isticmaalo oo goboladii kale waxba gaadhi waayo waa mashaakil oo stationarygii halkan ayaa looga diraa taasina suuro gal maaha waa in gobol waliba degmo waliba miisaaniyada ay toos u gaadhaa kharashaadkeedu.

Waxaa keliya ee toos u gaadha waa mushaharka shaqaalaha, Wasaarad waliba waxay u geysaa mushaharka shaqaalaha halkaas u jooga laakiin wixii kale halkan ayay ku baxaan waxaan soo jeedinayaa inagu dhexbaynu u nahay inaga loo bahan yahay inagaa la inaga doonayaa inaynu wax ka badalno waxaan soo jeedinayaa in wasaarad walba in kharashkeeda jajabino oo miisaaniyadaa 2014 maadaama maanta ina hortaal wasaarad waliba iyadu ay xilkaa qaado oo miis wixii ka dambeeya guddiga dhaqaalaha iyo golahaba waxaan usoo jeedinayaa miisaaniyad sida dakhligu u cad yahay  meel walba wixii kasoo baxaya kharashkana meel walba wixii ku baxaya waa inay cadaataa oo maanta ka dib siyaasadaa la badalaa oo aynu inaguna ka qayb qaadaanaa waayo hadaynu ognahay sida ay wax usoo baxayaan waa inaynu ogaanaa sida ay u baxaysana.

Waxaa kaliya ee la inooga kenaa waxaa weeye miisaaniyad is daboolaysa ayuunbuu xisaab xidhku oo kharashaadkeeda iyo dakhligeedu is daboolaysu uunbuu ku kooban yahay taa.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- In kharashaadkaa Wasaaradaha la dhaadhiciyo oo isu duwe kastaa oo wasaarad kasta gobol u joogaa wuxuu miisaaniyadaa halkaa uu u joogo wasaarada waa in lasameeyo ayaan soo jeedinayaa.

4. **Md. C/raxmaan Yuusuf Cartan:-** Gudoomiyaha iyo xildhibaanadaba waan saalaamayaa, salaam kadib, Miisaaniyada aad ayaa loo amaanay, waayo waxay timi wakhti hore, korodhsiimo badana waa ku jirtaa oo ay ka mid yihiin Ciidamada iyo Shaqaalaha aadna waan u soo dhawaynayaa, waxana soo jeedin lahaa sida ay Gudidda dhaqaaluhuba ay soo gudbisay ee ah aa jaamacada Ceerigaabo oo aan markii hore ku jirin waanan taageersanahay, waxaa kale oo aan taageersnahay in lacagta Madaarka Ceerigaabo oo ay hada wadaan taasna waxaan soo jeedinayaa in miisaaniyada loogu daro.

Waxaan mar labaad ku taageersanahay Gudida dhaqaalaha warbixintaa ay soo diyaarisey, waxaa kale oo aa leeyahay sida la sheegay in misaaniyadu ku saleysantahay baahiyaha wasaaradaha markaa waxaan ka codsanaynaa xukuumada ama wasaaraiyada maaliyada in ay ku khasbaan wasaaradaha kala duwan in ay soo gudbiyaan iyada oo gobolaysana mid faah-faasan, miisaniyada tan ku xigtana waa in lagu soo daraa

***Sidaa daraateed, waxaan soojeedin lahaa:-***

- In la ansixiyo misaaniyada oo si wacan looga soo shaqeeyay.

5. **Md. Ibraahim Axmed Haybe:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Martisharafta kale marka hore waan idin salaamay, xildhibaanadii hadlay qaar waan taageersanahay hadaladoodii, qaarna waan ku yar noqonayaa, tan xildhibaanada qaar yidhaahdeen Miisaaniyad weyn halagu keeno Gobol Gobol waxaan leeyahay taas xaq looguma laha Wasaarada Maaliyada, laakiin waxa weeye in Wasiirada loo yeedho oo laga xisaabtamo mid walba sida uu u gaadhsiiyo Miisaaniyada Gobolada, oo la yidhaahdo maxaad Gobolkaa ugu talagashay, Maxaa shaqaale kuu jooga iyo Xafiisyadaad.

Midna waa iska caadi, Shaqaalaha dawladu waa centralized, ciidamadeenuna waa centralized, hadii la yidhaahdo Gobolo ha loo eego, Maanta Gobolada

Bariga ee ugu hadalka badan Miisaaniyada inta ugu badan halkaasey tagtaa, waxaan ka soo qaadeynaa Ciidamada Qalabka sidaa 90% halkaasey tagaan iyo Booliiskuba waxayna Miisaniyada Qaranka Ciidamada ku baxa ka badan tahay 70%, taasi waa taa, waxaan leeyahay bariga lama ilaawine miisaaniyadu way tagtaa waxay kaloo gudididuna soo jeedisay halkana ku jirta sidii horumar loogu samayn lahaa gobolada bariga ee Fog gaar ahaan Gobolka Sanaag, oo la ogolaaday in wadadii la dhiso oo iskaa wax u qabso iyo xeer , qaadhaan dawladeed iyo in dunida wax loo waydiiyaba ah laysugu daro si loo fuliyo mashruucaas qarankuna uu isku raacay, waxa kale oo gudiddu soo jeedisay in jaamacadii lagu daro oo la tixgeliyo lana caawiyo looguna daro miisaaniyada.

Hargeysa wax walba lama siiyo, Hargeysi waa Hooyo wuxuba way wada imanayaan waanay ka baxaan, wax si gaara loogu qabtayna majiraan oon ahayn, infrastructure ka maadaama ay tahay xaruntii dawlada oo wasaaraduhu ka dhisan yihiin, haday Burco ahaan lahaydna Burco uun baa laga dhisaa lahaa haddii Sheekh la geeyana Sheekh uunbaa laga dhisi lahaa Xafiisyada, laakiin mid loogu danaynayo Hargeysa maahee maadaama ay tahay magaalo madaxdii Qaranka Xafiisyadu way ka dhisan yihiin madaxduna way joogtaa hantida umadduse way qaybsan tahay, waxa taa soo raaca waxa dadku leeyihiin ee koobaad ee gobolada iyo degmooyinku leeyihiin waa hantida Dawladaha Hoose, hantida dawladaha hoosena waa lakala leeyahay, dawlad hoose oo walibana waxay leedahay Xafiisyadeeda, cashuuraheeda waxay leedahay Servicekeed oo ay ururuso waxa xaq loogu leeyahay horumarinta gobolkaa ama degmadaa inay iyagu ka masuul yihiin inta badan sida ku qoran Dastuurka Qaranka taasna halkaasbaan ku dhaafayaa.

Waxaan is yar dul taagayaa oo dadku dhibaato kala kulmaan Miisaaniyada waxa ku taala cashuur ay wasaarada macdanta iyo tamartu kordhisay oo aan Ogolaansho Golahan ka helin, sida wasaarada maaliyaduna inoo cadaysay gudiduna inoo cadaysay, waxaan leeyahay haday jirto aynu celino miisaaniyada korodhkaana halaga saaro, cashuurahaas aan goluhu ansixina halaga soo saaro, waxa kaloo ku qoran miisaniyada gudiduna ka soo talisay dhawr iyo toban haayadood oo aan lahayn xeerkii ay ku dhisnaayeen, haayadahaas dhawr goor oo horena golahani jaanis siiyey gudiduna ay soo gudbiya tidhi oo aanay waqti siinin waxaan ku talinayaa halaga xidho miisaaniyada ilaa inta ay sharciyadooda keenayaan, waa in laga xidho miisaaniyada si ay u dadaalaan mudadaas ka hadhsan sanadka way ku soo diyaarin karaan inta January ka horaysa iyagay jirtaa haday ku soo diyaarin waayaana yaan loo sii dayn.

Waxaan ugu danbayn soo jeedinayaa dadku dhibay qabaan,haday tahay ciidamada, golayaasha Sharcidejinta iyo shaqaaluhuba in haddii ay xanuunsadaan oo dalka gudihiisa waxba qaban kari waayo in qaranku Caawiyo Xaqbaanay u leeyihiin, waa in miisaaniyada wax cad oo lagu xisaabtamo lagu daraa oo manta ma jirto meel loogu hagaago oo anigaygaa Xildhibaanka ahi ma aqaano meel aan ku hagaago hadaan xanuunsado ama Xafiis aan tago miisaaniyadaasina meel ay kujirto lama Yaqaaano, waxaan madaxda ka maqlayay markuu qofku xanuunsado waa in warqad loogu qoraa Madaxweynaha waxaan leeyahay arintaasi way fog tahay, waa in nidaam loo sameeyaa oo gaara laguna daraa miisaaniyada oo loogu talo galay dadkaa xanuunsanaya dhaqaalaahooda iyo caafimaadkooda sida loo bixinayana la ogaado, manta waxaan ognahay in madaxda qaranka, golayaashaba ka soo qaad in inta aan kaalmoba la siin uu inagu dhex dhinto inta uu kujiro sii noqo soo noqo, sahan danbe kaalay beri soo noqo, markaa waxaan soo jeedinayaa lacag cayiman iyo goob cayiman in arintaa lagu sameeyo miisaniyadana lagu arkaa iyo habkii ay ku bixi lahayd, taasna halkaasbaan ku dhaafayaa.

Gudiddu waxay halkan ku qoreen warbixintoodiina ka maqlaynay , waanu isla garanay, waanu isla qaadanay arintaasbay u badnayd, waxay inoo soo jeediyeen ee ay halkan ka akhriyeen, gudidda umaynu dirin, waxaynu u diranay inay Miisaaniyada dhex galaan hay’addaha dhex galaan oo wixii loo allocate gareeyey siday ugu filan tahay ama aanay ugu filnayn u eegaan, oo qaarna u kordhiyaan qaarna ka dhimaan, oo ay sidaa u dhex galaan oo Balance ka eegaan oo ay gacanta geliyaan, laakiin waxay inoogu soo gebagebeeyeen waanu la hadalnay waanu kawada hadalnay, waanu iska aragnay, cali xoor-xoorna waanu yeedhnay, Gudoomiyaha Baankana waanu is aragnay wixiiba waxay inooga dhigeen sheeko, hawshii aynu u diranay waxaan u arkaa inay qabyo tahay.

***Sidaa darted waxaan soo jeedinayaa:-***

- Inaynu dib gacanta u gelino  Miisaaniyadan, ASC WR WBRK.

6. **Md. Maxamed Axamed Maxamed (Dhakool):-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha Golaha marka hore waxaan idiinku salaamayaa salaanta islaamka, Miisaaniyada la inoo keenay ee 2014ka waxaan u arkaa wakhtiga la keenay tii ugu horeysay ee Miisaaniyad wakhtigii la keeni lahaa la keenay, waxaa ka muuqata xilkasnimo iyo daacadnimo wasaaradaa Wasiirkeeda iyo ragii la shaqeynayayba, sidoo kale korodhka dakhli iyada laftigeeda waxaa ka

muuqda amaano, markii hore wax leex leexda ha ahaadeen ama wax si kale loo maamulo ha noqdeene iyana laftigeeda amaanaa ka muuqata.

markii hore waxaa aad la isugu qabsan jirey lacag dakhliya oo aan miisaaniyada lagu soo darin oo Goluhu aad u ogaa inay jiri jirtey, manta waxa carabka lagu hayaa kharash, habka kharashka loo maamulayo Gobolada ha noqoto ama guud ahaan ha noqotee, waxaan taageerayaa sida xildhibaanada iminka ka hadlay in dhaqaalihii Gobolada si saxa u wada gaaadhin, waan dareemayaa in dhaqaalaha wadanka soo gala aanu ka wada muuqanin siiba Gobolada Sanaag iyo Sool, waxaa ka muuqata korodhka kharashka ee Wasaarada inoo keentay in iyadoo labadii Gobo lee ugu baahida badnaa wadanka waxaan qabaa inay labadaa Gobol ka qatan yihiin, markaa waxaan soo jeedinayaa in Labadaa Gobola korodhka kharashka wax ha laga daro waxyaabahay tabayaan Goboladaasi oo miisaaniyada Qaranka wuxuun laga biiryo waana lagu raacey Gudoomiye.

Iminka meesha laascaanood la yidhaahdo biyo qadhaadh baa laga cabaa mudoba laba jeer ayaa la isku dayay in wax lagagaliyo oo hay'adaa lacag yar bixiyay labadii jeerba way fashilantahay arrintaasi, markaa arrinkaas oo mudanayashu igu raaceen ayaan soo jeedinayaa.

Tan Miisaaniyada waxaan dareemayaa, mar hadii Gudidii iyo Wasaaradii wax isku dhow keeneen wasiirkiina shahaado sharafna aynu siinay waxaa loo baahanyahay in shahaadadaa waajibkeedii gudano.

***Markaa waxaan soo jeedinayaa:-***

- Marka waxyaabahaa Gobolada Sanaag iyo Sool ee aan soo sheegay lifaaq ahaan loo raaciyo in Miisaaniyada la ansixiyo.

7. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** shir-gudoonka iyo Mudanayaashaba waan salaamayaa, arrinta miisaaniyada in hortaala maanta ee 2014ka, runtii wakhtiyadii caadada u ahaan jirtey Xukuumada wakhti ka duwan inay keenaan waan ku hambalyaynayaa Xukuumada iyo Wasaarada Maaliyadaba, runtii wakhtigaa la keenay wuxuu keensanayaa in miisaaniyada la eego, laga doodo, hoos loogu dhaadhaco oo si mug leh loo darso oo waliba wax ka badal iyo kaabisna lagu sameeyo ayay koobsaneysaa Miisaaniyadu, waxaana filayaa Wasaarada Maaliyadu ka dharagsantahay maadaama oo ay dastuuri tahay in Golaha wakiiladu uu ka guto waajibaadkiisa sharci ee ku saabsan wax ka badalka iyo kaabista Miisaaniyada Qaranka.

Halkaa hadaan intaa ku dhaafo, Miisaaniyada 2014 waxaa loo gudbiyay Gudiddii ku shaqada lahayd si ay warbixin ay uga keento Golaha iyadoo kooban dhinacna ka faah-faahsan, waxaa muuqata Gudiddii dhaqaaluhu sidey iyaguba sheegaan in Miisaaniyadii wakhti ku filan u helin, in aanay soo wareysan meelihii dhakhliga miisaaniyada ku jiraa ka iman lahaa oo aanay wakhti fiicanba u helin, waxay tilmaameen dhowr meelood oo Wasaarada Maaliyad, Baanka iyo Dekedu ka mid tahay arkeen, waxaana ka muuqata in xoogaa nuqsaan ahi ku jirto Miisaaniyada qaranka, sidaa daraadeed baa lagama maarmaan ah in Goluhu Miisaaniyada siweyn u eego oo u guda-galo.

Qodobka ugu horeeya ee anigu runtii is dultaagayaa wuxuu yahay miisaaniyad kastaa waxay xambaarsantahay waxyaabo guud oo sida ka muuqata, Miisaaniyad 2014ka waxaa lagu tilmaamay waxyaabaha Miisaniyadu qabaneyso 23 qodob oo ka kooban tahay uguna muhiimsan tahay Horumarin, waxaa ii muuqata in Siyaasda guud ee manta wasaarada loo soo bandhigey qodobkii halbowlaha u ahaa uu ka maqan yahay.

Waxaa ii muuqata inay ka maqan tahay, qadiyad halbowle u ah Bulshada Somaliland oo ah shaqaaleyntii ardeyda ka soo baxaysa Jaamacada iyo dadka shaqada la’ ee makhaayadaha fadhiya ee ka sheekeynaya oo ahayd hadii miisaaniyadii dakhli badan soo galay in lagu daro oo da’yarta iyo kuwa shahaadada sita in miisaaniyada looga meel dayo oo tusaale ahaan la yidhaahdo 1000 qof hala shaqaaleeyo oo ay tahay in Miisaaniyadan la raaciyo oo lifaaq looga dhigo madaama Miisaaniyadii korodh ku yimi, waxaan soo jeedinayaa in qeyb looga qoondeeyo ardeydaa iyo dhalintaa oo lagu shaqaaleeyo.

Qodobka kale ee aan taas raacinayaa waxa weeye, 2013kii waxaanu Miisaaniyada ku ansixinay waxyaabo badan oo Gobolada loo qabanayay oo Miisaaniyada 2013ka ku jirtey, tan 2014kana ka maqan, mar hadaan markasta la xisaabin oo la odhan maxaa laga qabtey waxyaabihii siyaasada miisaaniyada ku jirey ee Wadooyinka iyo caafimaadku ka mid ahaayeen maxaa laga qabtey hadaan taa la isweydiin, maantana tan la isma weydiin doonto, markaa in wax cad la tilmaamo oo manta aynu nidhaahno ha dhiso Wadadaa isku xidha berbera iyo hargeysa ee maalin walba dhibaatadu inaga soo gaadho sanadkan waxaa la dhisayaa waddadaa la yidhaahdo oo miisaaniyada qeybo ka mida u qoondeyno oo Siyaasada miisaaniyada ka mid noqoto ayaan siyaasada guud ee Miisaaniyada 2014ka.

Markaad is-barbar dhigto Miisaaniyada Wasaaradaha aad iyo aad bay u kala sareeyaan miisaaniyadaha wasaaraduhu waliba wasaaradihii ahaa laf-dhabarta bulshada ayaa miisaaniyadoodu aad u hooseyso, kuwo aaan bulshada u dhexgalina Miisaaniyadoo aad u sareyso oo aan halkaa cadaaladi ka jirin, tusaale ahaan Wasaarada Deegaanka, Wasaarada Diinta iyo awqaafta, wasaarada Beeraha, Kaluumeysiga iyo Ganacsiga oo ah wasaaradihii wax soosaarka lahaa miisaaniyadoodu aad bay u hooseysaa oo ka badan yihiin meelaha qaarkood kharashaadka lagu bixiyo khidmada baanka, kharashaadka daabacaada, kharashaadka codbixiyayaasha dadweynaha oo aana garaneyn runtii waxay tahay iyo waxay qabanayaan, kharashaadkaasi waxay ka badan yihiin Wasaaradahaas wax soo saarka leh oo Wasaarada awqaafta iyo Wasaarada Beeraha dhaqaale yaraan darted ay wax qaban kariwaayeen oo wax qabadkoodu yaraado, markaa waxay tahay in la kaabo Wasaaradahaa si bulshada wax qabad ugu sameeyaan.

Sidoo kale waxaa taas la mida iyana sadexda ciidan oo iyana u baahan madaama laf-dhabar u yihiin nabadgalyada iyo bulshada in iyana Miisaaniyadooda la kaabo oo kor loo qaado miisaaniyadood, tusaale Wasaarada Maaliyada iyo Wasaarada waxbarashada miisaaniyadoodu saddex lab bay ka badan yihiin Miisaaniyadaha Ciidamada, in miisaaniyadaa la helona waxaa laf-dhabar u ah saddexdaa Ciidan, markaa in la iyagii xooga la saaro miisaaniyadaa cadaaladna way u noqon lahayd waxqabana way u noqon lahayd, ***Markaa waxaan soo jeedinayaa in Miisaaniyadan la raaciyo Lifaaq ah in Wasaaradahaas iyo saddexda Ciidan kor loo qaado.***

Tusaale ahaan, Wasiirkii Maaliyada oo miisaaniyadiisi ina hortaal, Gudoomiyihii dhaqaalaha labaduba waxay tilmaameen oo qireen in hay’addo badan oo Miisaaniyada ku jiraa aaney sharci ahayn oo ay la isla qirey, madaama taas la isla qirey gudidduna soo tilmaameen, marka hadaanay sharci ahayn sabab miisaaniyad loogu ansixiyaa aniga iima muuqato***, markaa waxaan ku raacsanahay Mudanayaashii iga horeeyay in la horkeeno golaha hay’addaha aan sharciga ahayn miisaaniyadaha halkan ugu jirtana la hakiyo ilaa inta laga helayo sharciyadoodii***, Xafiiska qaryaqanka gud isaga waxaa lagu ansixiyay Xeerka nidaamka Garsoorka oo uu ku dhex jiro.

Gudidda dib u-habeynta sharuucda Goluhu wuxuu kal-fadhigan soo jeediyay in ajendaha laga saaro madaama aan shaqadoodii manta loo baahneyn oo hay’addihii shuruucda ka shaqeynaysa ay jiraan, markaa sabab in manta loo

soo saaro meesha kuma jirto, ***markaa waxaa aad u adkeynayaa in 9kaa hay'addood ee aan sharciga ahayn laga saaro miisaaniyada.***

Arrinka kale ee Wasiirku ka Hadley ee ah 2% gobolada bari in markii ugu horeysay Miisaaniyada lagu soo daro oo waxyaabuhu ku faanay ka mid ahayn wuuna ku mahadsanyahay, laakiin qaabka ay ugu jirto iyo qaabka loo isticmaalayo iyo qaabka ay tahay loogu talogalo kuma jirto oo kuma cada, iyadoo loogu talagalay horumarin ahaan iyo dhismayaal ahaan Gobalada bari ah, ***waxaan ku waafaqsanahay in lifaaq la raaciyo ah go'aan gole Miisaaniyada oo ah 2% Gobolada bari oo gorfeysan oo nidaamsan horumarkii loogu talagaley la raaciyo miisaaniyada.***

Waxaa jirta hadii aad hoos ugu dhaadhacdo arrinta Miisaaniyada dhowr arrimood oo ay tahay in mudanayaashu eegaan waxaa jira madax xigeeno aad u buun-buunsan oo kharash aad u fara-badan ku jiro oo dhowr meelood miisaaniyada kaga jirta, mid walbana waxaa ku jirta lacag dhowr milayn gaadheysa, markaa kuwaas oo kale waxay u baahanyihiin in dib loo eego, khasnada dawladaa ka mid, iibsiga Dawan baa ka mida, Iibsiga xaafiisyada iyo dhismayaasha ayaa ku jira oo Wasaarada kasta ka muuqda waxaa Miisaniyada ku jirta in lacag dheeraada inoo soo hadhey oo 30 bilyana oo ay miisaaniyada raacsantahay markaa maxaa loogu bixin waayay lacagtaas deeymahan raacsan oo loogu bixin waayay.

Qodobka kale, waxaa ku jira Miisaaniyada dakhliga ku saabsan haamaha shidaalka ee TOTAL ee iminka xukuumadu la wareegtey sidii bay accounts u furan yihiin sidii bay kharashkii loo qaadaa, kharashkaa la qaadey kama muuqato Miisaaniyada meelay ku baxdo iyo qaab loo qaadey, Sidaa darted waxaan soo jeedin lahaa in Qododbkaa hoosta laga xariiqo oo la cadeeyo kharashkaasi meeshuu ku baxay iyo halkuu ka dhacey.

***Waxaan anigu soo jeedin lahaa oo aan Miisaaniyada ku dari lahaa:-***

- In Qodobadaa oo ka dhiman uu Goluhu weynu isla qaato intaan la ansixin Miisaaniayda lagu daro, ama la isla ansixiyo go'aanona laga dhigo markaa miisaaniyadana lala ansixiyo.

8. **Md. Xaashi Xuseen Caabi: -** waxaa la inoo keenay Miisaaniyada Sanadkan wakhtigii ku haboonaa taasaan marka hore ku bogaadinayaa Wasaarada iyo Wasiirka, Miisaaniyadii Sanadkii hore ee deg-deg baynu u ansixiney oo abaal gud beynu uga dhigeynay Wasaarada iyo Wasiirkaba.

   Sanadkan waxa filayaa in marka aan is dultaagney iney ku jiraan waxyaabo aad u faro-badan oo soo noqnoqnaya, waxaa jira hay'ado aan sharci ahayn oo ku jira sidii Mudane M.Saalax uga ka hadlayay oo ilaa 10 hay'addood ah, markasta oo Miisaniyada la keenoba aynu nidhaahno ha la keeno sharcigeedii, hadana dhag looma yeesho oo sanad walba way iska jiraa.

   Waxay kala yihiin 9ka hay'addood sideynu ka war-qabno, hay'adda Dhowrista tayadda, Komishanka Qurbo jooga, Hay'adda Xidhiidhka Raaashinka oo iyana cusub, ICT, Gudidda Agaasinka Tacsliinta, Gudidda Tacliinta, Somaliland National Tv, Khasnada Guud ee Qaranka iyo Gu'didda Dib u-haybeynta shuruucda oo iyada aynu ka saarney Ajendaheenii, Gudidda Diiwaangalinta Ururada oo iyada wakhtigeedii dhamaadey.

   Markaa horta waxaan soo jeedinayaa haya'addod oo ku fadhiya lacag ah **165 bilyan** oo gaadheysa **$26 milyan** waxaan leeyahay waa in la hakiyo ilaa inta la ina horkeenayo oo Goluhu ansixinayo, waxaa kaloo jirta in sida xildhibaanadii iga horeeyay sheegeen kharashyo soo noqnoqdey oo meelo badan ku jira oo aan loo fiirsan, Markaa hadaan soo qaato Wasaarada Maaliyada iyana waxaa ku jira **29 bilyan** oo ilaa **$3 milyan** ah oo lagu magacaabo Guno maaliyadeed, maan garan iyana Gunnadaa.

   Waxaa kaloo ku jira kharash la yidhi lama filaan oo ah ilaa **1.575 bilyan** oo noqoneysa **$5 milyan,** Sidoo kale Wasaarada Madaxtooyada oo aad moodo fundkeenii inuu madaxtooyada iyo Wasaaradaawaxaa ku hoos noo ay ka badan tahay **100 bilyan** way ka badan tahay iyada oo qudha waxa weeye **40 bilyan, 110 bilyan** ilaalada ah, waxaad moodaa dhaqaalihiiba in halkaa la isugu geeyay iyo quwad, waxaa ku jira kharash lama filaana madaxtooyada 16 bilyan ma sheydaan baa qaata, muxuu yahay kharashkaasi, waxaa meel walba ku jirta bilaasha taagan ilaa Wasaarada Biyaha iyo Madbacada, waynu naqaan hadii ciddi u baahan tahay Miisaaniyadeed wax ka badan inay isticmaasho dee waa in Barlamaanka lagu soo celiyaa oo uu ogalaadaa, laakiin waxaa batey hay'ad walba tiraahdo biilal taagan baa jira, Waa sharci daro waxaasi waa in laga saaro.

Waxaa jirta Deynta Qaranka, deyn qaran baa meel walba ku jirta oo Wasaarada Maaliyada ku jirta, Markey deyn qaran tahay waa wax ina wada saran waa wax dawladuhu kala qaatan oo markeynu dawlada ama World banka wax ka soo amaahano bay deyn qaran noqon kartaa, Wasaarada Madaxtooyada waxaa ugu taala **6 bilyan** oo deyn qaran, waxa weeye wax la yaab leh, biilasha taagana maaha, macnaha deyn qaran waan waayay, waxaan u arkaa wax wax lagu xalaashanayo.

Waxaa jira waxyaabo badan oo iska soo noqnoda, Kharashka cod bixiyayaasha dadweynaha, ma laaluush la siinayaa, waa maxay cod-bixiyayaasha dadweynuhu, af-ingriib baan u rogoo waan garan waaya macnaha waxa looga jeedo, daabacaada documentiga, waxaa la daabacaa dee lacag bay soo celisaa, masalan passports baa la daabacaa iyo driving lecense, waxaas kharashkooda Miisaaniyada waa lagu soo daray, laakiin lacagtii ay soo celinayay ma hayno, oo passportgii lacag baa lagaa qaadayaa, xisaab celintooda meelay ka muuqataa ma jirto, wax yaabahaasi waa ceebaha ay Miisaaniyadu leedahay.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- Waxa weeye lama diidana Miisaaniyada, laakiin ha la saxo oo aynu raacino Miisaaniyada lifaaqyo sidii barigii hore, waad mahadsantihiin.

9. **Md. Baar Siciid Faarax:-** Marka hore waan idin salaamayaa, bacda salaam, bacda salaam, markaan ka hadlo miisaaniyada, waxaa lagu hamblayeeyay wakhtiga la keenay, waana ahayd in lagu hambalyeeyo, laakiin mayna ahayn in lagu hambalyeeyay sida shaxda Miisaaniyadu u dhigantahay, waxaan aad uga xumahay in dhalinyaro badan oo bilaa shaqo ah ay wadanka ka buuxaan oo dhibaatooyin tahriib haysato aan hadana wax shaqaaleyn ah miisaaniyada ku jirin in sanadkan lagu daro waa nasiib daro aad u weyn oo aan ka xumaxay waana ka tacsideynayaa.

   Miisaaniyadaas waa mid aad isugu soo noqnoqoneysa sida Mudane xaashiba sheegey, meelo badan ku kala jir jirta, waa miisaaniyad ay ku qoran tahay waxyaabo badan oo aan la garaneyn waxay tahay, waana waxyaabo ku soo noqnoqonayey Miisaaniyadaha wakhtiyo badan, waxaan aad uga xumahay Wasaaradihii Beeraha, Arrimaha Bulshada, Kaluumeysiga iyo deegaanka oo dhulkeenii wax ku socda aynu la socono iyo dhuxusha maraakiibta laga rarayo iyo seerayaashii oo meesha ka baxay.

Waddoyinka iminka wax loo ansixiyay oo aan iyana Miisaaniyada waxba kaga jirin, wadanka oo kala go'an anigu markaan soo qaato Gobolkeyga Sanaag gaar ahaan Magaalo madaxdeedii Ceergaabo, dhamaana Gobolkaasi waa Gobol dalka ka go'an marka dhulka la eego iyo marka cirka la eegoba, dhakhtaradoodu malaha adeeg caafimaad oo qeylada ka baxaysa dhaktarka Magaalada Ceergaabo waa mid aan la qarin Karin, mooyi wax wax loogu soo dari waayay malaha xukuumada iyo wasaarada caafimaadka looma sheego ayaan is idhi, dhakhtarka hargeysa marka la eego anigu waan tagaa dhakhtarkaa waxaa ka jirta baahi caafimaad oo aad u weyn iyo adeeg xumo iyo dhaqaale xumo, kuwa ka shisheeyana iskabadaa hadlkiisa.

Waxaan filayay in Wasaarada Beeraha Miisaaniyadeeda la xoojiyo, sidoo kale la xoojiyo Wasaarada Kaluumeysiga, wasaarada arrimaha bulshada, Wasaarada Deegaanka, halka laga rarey miisaaniyada Wasaarado kale oo xoogaa shaqaale ay joogaan oo ah wasaarado siyaasadeed, halka wasaaradihii wax soo saarka ee shaqada laga helayay wax loo kordhin lahaa.

**Dhakhtarka Ceergaabo** oo sidii hay'adii uga guurtey albaabadu u xidhantahay, sidoo kale Garoonka diyaaradaha ceergaabo wuu xidhanyahay oo dalkaba wuu ka xidhan yahay, waxaana is lahaa sanadka Miisaaniyada waa lagu soo darayaa, waxaan garan waayay biilasha taagan oo Meel walba ku jirta waxay tahay, deynta qaranka oo iyana waligeedba ku jirta miisaaniyada ma mid aan dhamaan baa, la imana ictiraafine dawladana deyn inama siiyaane.

Cod-bixiyaasha taagan iyana cod-bixiyaashasi waa maxay, waxaa wax la mida ayaa ku jira Miisaaniyada, waxaan aad ula yaabey oo aan isleeyahay Miisaniyada culeys oo Wasaaradahaa aan sheegayo ay u baahnaan lahaayeen halka lacag badan loo qorey meelaha sida Khasnada Guud, khasnada qaranka, Wasaarada Maaliyada oo lacag badan loo qorey, maaha markaanu sheegayno waxyaabaha dhaliisha ah in dadka col lala yahay.

Wasaarada Madaxtooyada oo wasaaradaha aan sheegayo ka lacag badan marka la isu geeyo miisaaniyadahooda, waxaa ka shaqeeyaa shaqaale yar, Ciidanka Ilaalada Madaxtooyada isna lacag aad u badan baa u qoran, Tvga qaranka iyo Wasaarada Warfaafintaba waxaa ku qoran lacag aad u farabadan.

Waxaan soo jeedin lahaa in meelaha aan sheegay ee lacag badan ku qoran tahay 40% miisaaniyadooda aynu ku wareejino:-

- Wasaaradaha Beeraha, Kaluumeysiga, Arrimaha Bulshada oo shaqaaleyn u baahan dhalinteenii dhibaatadu hayso.

- Wasaaradah Deegaanka oo dab ku baxayo deegaankeenii oo shaqaale badan oo deegaanka ilaaliya oo is hortaaga dhibta deegaanka lagu hayo.

- Sidoo kale Dhakhtarka Ceergaabo, dhakhtarkaa in loo qoondeeyo lacag aad baan u codsanayaa waayo dhibaato aad u weyn baa ka jirta dalka inta kale intuu u jiro waad ogtihiin.

- Iyana Wasaarada Xaanada Xoolaha iyo dhakhtarka Hargeysa oo inyar inoo jira bal hoos ha loo eego dhibaatada ka jirta isna.

**Waxaan kaloo soo jeedinayaa**: - Waddoyinkii la yidhi waddoyinbaa la sameynayaa oo aan taageersanahay in la sameeyo iyana Miisaaniyada waxba lagagama soo darin, marka laga reebo xoogaa maalintii dhoweyd la ansixiyay.

**Garoonka diyaaradaha Ceergaabo,** waxaanu u tagney hay'adoo badan oo halkan degan waxay naga qaadeen balan inay wax ka qabanayaan hadii miisaaniyada wax loogu soo daro inay iyana wax ka qabanayaan, laakiin hadii idinku wax aydaan qabsan anagu ma tagi karno waxna idiinma qaban karno, Markaa waxaan soo jeedinayaa in Miisaaniyada **$300,000** looga jar jaro oo loogu daro, si dadku u dhiirado oo wax la inoola qabto, dhibaato aad u balaadhan baa Gobolkaa ka jirtee.

***Waxaan odhan lahaa:-***

- Miisaaniyadan Wakhti badan baa inoo hadhsan oo aynu haysanaa sanadkii, Marka Dib loogu noqdo oo la saxo waxyaabaha khaldan ee aynu soo jeedinay sixitaankooda in Miisaaniyada la ansixiyo, Marka laga reebo hay'adaha aan Sharciga aheyn ee ku jira Miisaaniyada.

- Gudidda dib u-habeynta shuruucda oo aan iyada soo jeedinayo Gabi ahaanba in laga saaro Meesha mar hadaanay gudi sharciya ahayn, kharashkeedana Wasaaradaha ha lagu daro, dhamaan hay'adahaa kale

ee aan sharciga aheyn inta sharcigooda laga keenayo la hakiyo Miisaaniyadooda.

- 2% Gobolada Bari loo qoondeeyay wax shaqeeya maaha, meeluu ka shaqeeyona anagu ma ogin, dadkayagana muu gaadhin, Markaa isaga waa in la soo Mashaariiceeyo waxa lagu qabanayo.
- Waddoyinka aynu ku soo darney ee aynu xoogaaaga dhaqaalaha u ansixiney in 20% Miisaaniyada iyada loogu daro.
- Shaqaalaha iyo Ciidamada waxaan soo jeedinayaa in 30% looga dhigo waayo shaqaaluhu aad bay u baahan yihiin, shaqo badana wey haysataa.

10. **Md. Axmed Maxamed Nuur:-** Mudanayaal salaam ka dib, waxaan halkan uga mahadcelinayaa Wasiirka Wasaarada Maaliyada waa teynu siinay shahaado sharafta waa wasiirkii ugu horeeyay ee Xiligeedii ku keena Misaaniyada, waxaanse sheegayaa Miisaaniyadan aan gacanta ku haynaa mad-madaw badan bay leedahay miisaaniyada cadna maaha , waxaan filayay inay laba arrimood oo muhiima xoogey saareysaa weynu ogeynoo intii xukuumadani talada dalka qabatey 3 miisaanayadood oo hore ayaanu goluhu hoos u eegin oo ay noqotey in la sii daayo, manta kamaan filey xukuumada laba qodob oo aan islahaa xooga la saarayaa.

Qodobka kowaad, waxaan filayay oo aynu ka warheynaa dhalintii jaamacada ka soo baxdey waa ku wan tahriibaya oo badaha ku dhimanaya iyo saxaraha, in dhoweydna waxaan arkayay waliba wasiirka shaqada iyo Wasiirka qorsheynta oo ka doodaya sidii dhalinta shaqo abuur loogu sameyn lahaa, waxaan filayay in caruurta dhalinta ah loo sameeyo mashaariic shaqo abuur oo laga joojiyo

Waxaa kale qodobka labaad aan filayay in xooga la saaro sidii horumarin loogu sameyna lahaa hay'addaha wax soo saarka sida Wasaarada Xanaanada Xoolaha, Beeraha Kaluumeysiga, Deegaanka iyo Shaqada iyo arrimaha bulshada, waxaa nasiib daro ah labadaa qodob ee Xukuumada ka filayay inaan midna wax naf leh laga soo qaadin miisaaniyadan, Miisaaniayda aniga waxaa iga filaatey Misaaniyada Wasaaradaha Xanaadaha Xoolaha, Wasaarada Beeraha iyo Wasarada Kaluumisiga markaan isugeeyay miisaaniyadoodii waxaa ka badan oo kaliya TVga qaranka, Markaa Miisaaniyada arrinka aad baan ugu naqdiyay waayo saddex Miisaaniyadoodu waxay isku noqotey **13,108,994,000,** TVga Qarankuna wuxuu noqdey **15,668,000,000.**

Hadaba aan eegno qaar ka mida wasaaradaha iyo hay'addaha kale miisaaniyadahooda, mudanayaal Wasaarada Mataxtoyada waxyaabahan ku naqdiyay waxaa ka mida, Wasaarada Madaxtooyada waa 41 bilyan, waxa loo dulqaadan karo maaha, meeshay galayaana garan mayo anigu, waxaa ku jira kharashka lama filaanka ah, 16 bilyan haday lama filaan yihiin ma khasnada ku hadhaan, Wasaarada Madaxtooyadu maaha Wasaaradii maaliyada markaa maxaa keenay Wasaarada madaxtooyada, miisaaniyada 2014ka waxaan u arkaa wax lama filaan wada ah.

Hadaynu eegno Wasaarada Maaliyada iyana waxyaabaha ku dhex jira waa la yaabayaa iyana, Wasaarada Maaliyada meelahan naqdinayo waxaa ka mida ururinta Guno maaliyadeed oo sanadkii hore **15 bilyan** bay ahayd, mantana **10,290,400,000** bilyan, Guno guri iyo xill waa 1,214,000,000, khidmada baanka waa 7 bilyan, waa noocaas oo iyadna sidoo kale sameynta databaseka waa 200 milyan, waxaan is weydiinayaa Mudanayaal waxaas lacag ahi marka miisaaniyada la sameynayo dee wasaaradu waxay leedahay shaqaaleheedii, shaqaalaha dawladuna intey yihiin ma naqaano markaa waxaas oo guno ah waxa kala yihiin garan meyno miisaaniyadeeda totalkeedana waa 49 bilayan.

Waxaa ka sii daran taas khasnada guud, khasnadaa guud waa khalad markeeda horeba dee wasaarada maaliyada hoos tagayeen xataa xukuumadii hore waxaa ku qoran in laka saarona may ahayn, kharashka derajada Ciidamada waxaa ku qoran 23 bilyan, derajadii ciidamada waa in tiradoodii la helaa, Ciidan kasta sida Militeryga waa in la helaa tiradooda hadii la leeyahay waa sir, Mudanyaal wax sir ka ah Xildhibaanada ma jiraan.

Halkan waxaa ku qoran cadaalada dhaceysa darted Miisaaniyada Ururka NOW, ma hay'adda dawladeed baa, ururo badan baa jira dalka maxaa loogu sameyn waaya NAGAAD, ODXA iyo ururda dhimirka maxaa loogu sameyn waayay miisaaniyad, dad islaameynu nahay hadaad eegto Miisaaniyada Wasaarada Diinta iyo Awqaaftana waad yaabi, masaajido badan baa jira Gobolada dalka iyo degmooyinka Gunada ku qroan iimaamyada waa 298 milyan hargeysa kaliya iimaamyadeeda kuma filna, Wasaarada Miisaaniyadeedu kuma filna hawlo badan baa laga rabey inay kormeeraan gaadiidka wasaaraduna waa 2 gaadhi oo wasiirka iyo agaasimuhu wataan.

Waxay ahayd inoo soo hubiyaan malcaamadaha waxa ka socda masaajidada waxa ka socda, dugsiyada privateka ah inay manhaj u sameeyaan, Masaajidada dalkana hargeysa uun bay Miisaaniayda wax ugu jiraan biyaha

iyo leydhka ah dalka inta kale maaney xaq u lahayn, waxaa leeyahay Wasaarada miisaaniyadeeda kor ha loo soo qaado oo ha lagau kordhiyo meelaha lacagaha dheeriga ah ee aan xaadirin doono ha lagu kaabo kuwaas oo ah hay'ada abaabul ka saarka qaranka waa 30, 834,000,000, oo u dhiganta 5,440,000 oo dollar, raashinka iyo timirta ciidanka booliisku waa 4,626,000,000 oo dhiganta 1,907,000 dollar, waxaas oo dhan miisaaniyadey ku wada jiraan, Markaa waxaa loo baahanyahay naafadu intey tahay, agoomuhu intey yihiin, shaqaalaha dawladu intey yihiin.

Waxaan soo jeedinayaa markaa in la hakiyo Miisaaniyada ilaa inta la helayo shaqaaleheeda liiskeeda grades kala leh, waxaana odhan lahaa Wasaarada Maaliyadu ha soo raaciso miisaaniyada cadeymaha iyo macluumaadkii sheegayay tirade Ciidamada iyo Shaqaalaha ee Miisaaniyadahooda, taaseynu ku aamin karnaa oo ku sii deyn karnaa.

Waxaa jira mudanayaal hay'addo madax banana, sida Dekada berbera, Wakaalada biyaha hargeysa, wakaalada Xooga korontada, Xukuumadii tan ka horeysay sanad walba waxay ka heli jirtey dawlada dhexe faa'iido ayaa ugu jirtey, iminka iyagii baa isgoostey markaa mar hadaaney faa'ido ka helayn waxaa haboon in mid walba wasaaradii laga soo gooyey lagu celiyo oo la hoos geeyo, waxaa haboon in qolada imaraadka ee dekada kireysata inaynu ku wareejino oo faa'iido ka qaadno, haba lacagtan way go'daaye xagey ku dhacdaa, halkan kuma qorna meeshay ku dhacdey waa in la helaa lacagtaasi halkey ka tagtey oo goleheenu wuxuu leeyahay gudi daba-galka hantida qaranka markaa gudidaasina hawsheeda inay qabsato weeye.

Waxaa kale oo jirta 2% Gobolada bari lacagtaasi horta xisaab xidhadhadana kumeynaan arag meelay tagtona ma garaneyno, Mashaariic horumarineed oo lagu filiyayna meynaan arag, iminkadan lafteeda 24 bilyan ee ku qoran dee waxaa fiicneyd in wax lagu fulinayo lagu soo qoro oo ay miisaaniyadan ku cadaato.

Waxaan leeyahay mudanayaal, waynu aragnaa dhalinyaradeenii tahriib bay ku waalatey markaa waxaan leeyahay ilaa 5000 ha la shaqaaleeyo oo wasaaradaha Xukuumada dhexe iyo dawladaha hoose waa in lagu shaqaaleeyaa.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- Miisaaniyadan ina hortaal anigu waxaan filayaa inaaney ahayn mideynu sidaa ku sii deyn karno, markaa waxaan ku talinayaa adhoc committee ha loo saaro, hadii la ansixinayona go'aan gole oo lifaaq ah raacinayo ha lagu ansixiyo.
- Meelahana aan soo sheegay ee dhibaatadu ka jirtona ha lagu kaabo meelaha lacagta badan u qoran tahay meelahan sheegayo in la kabona waa meelaha wax soo saarka ee Wasaaraha Beeraha, Deegaanka, Kaluumeysiga iyo wixii la mida.
- Waxaa kaloo jira hay'addo sharci daro ah, hay'addahaas ha la hakiyo dhaqaalohooda ilaa inta shuruuc looga soo sameynayo aynu ku ansixino.

11. **Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-** Mudanyaasha iyo Shir-gudoonka dhamaan waad salaamantihiin, waxaan jecelahay inaan Miisaaniyada 2014 guda galo, siyaasda Miisaaniyada 2014ka maaha mid ka turjumeysa baahida dhabta ah ee uu leeyahay qarankani, Miisaaniyad marka la sameynayo waxaa laga maarmaan ah iney ku salaysnaato baahida dhabta ah, waa inay ka turjuntaa kharashkeeda iyo dakhligeeduba sida biyaha, beeraha, Reer miyiga, shaqaalaha iyo Ciidanka kordhinta mushaharkooda iyo qorista shaqaalaynta dhalin yarada ku dhamaatay tahriinka, kor u qaadista dhaqaalaha, kor u qaadita kaluumaysiga iyo wax soo saarka, kor u qaadida caafimaadka bulshada.

    Dakhliga miisaaniyada waxaa ka muuqda korodh labanlaab ah taas oo saamaysay dhaqaqaalaha iyo miciishada, taas oo ay keentey korodh cashuuro xad dhaafa, waxaana ila haboon in aan ka hortagno taas iyo cashuuraha la kordhiyay.

    Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal, waxaa dhibaato ah iyadoo ay jirto saameynta nolosha ee kor ku soo sheegay hadana waxaa jirta in korodhkaa cashuuraha iyo takaaliiftana aan loo adeegsan meelihii ku haboonaa ee loo is ticmaali kari lahaa tusaale, ahaan khasnada Guud ee dawladu waa hay'ad sharci daro, wasaarad ama hay'ad gaar u taagan maaha, mana yeelan karto miisaaniyad u gaara ama lacag u gaara sida uu wasiirku sheegay horteena in sanadkan iyo sanadki hore ay ku jirtey Miisaaniyada.

waxaa ku qoran lacag xadigeedu aad u farabadan yahay oo aan u arkey in laga joojiyey lacagtaa hay'adihii ama wasaaradihii qarankan ee ku shaqeyn lahaa, tusaale hadaan u soo qaado khasnada guud ee qaranka waxaa ku qoran lacag dhan **165.327 bilyan sl.sh/** ah oo u dhiganta **$26.242 million**, lacagtaasi waxaan u arkaa inay ahayd lacagtii hay'ado iyo wasaarado badan oo dalka faa'iido u leh oo laga soo leexiyey sida wasaarada beeraha iyo kaluumesiga waxaa u qoran lacag aad u yar.

Kagaaga sii daran lacagta xadigaa leh cidda isticmaaleysa iyo sida loo isticmaalayo ma cadda, halkan waxaa ku qoran tafaasiil iyadoo lagu soo qorey qofka akhriyaa tafaasiishaa inuu aad ula yaabayo, waxaa ku qoran kharash safaro dibadeed, kharash shaqaale aan joogto ahay, guno shaqaale kuligood kuwada cayiman kharash ay wasaaradaha kale leeyihiin sida Nabadgalyada oo kale Wasaarada Nabadglayada way ugu jirtaa kharashkeedii halkana waa la soogaliyay oo labada meeloodba way ku xusan tahay.

Markaa lacagta ceynkaas ah ee aan la garaneyn wasiirka authorityga u leh ee isticmaalaya, waa mid lagu qarsadey oo musuq maasuq iyo madaw farabadan ku jiro oo loogu talogalay in lagu lunsado, waxaa ka mida Wasaarada Maliyada waxaa u qoran **49.332 billion oo sl. Sh/** ah oo u dhiganta **$7.831 million,** 2009dii Dawladii Daahir rayaale waxaa u qornaan jirtey Wasaarada Maaliyada **27 bilyan** shaqaale u kordhey ma jiro oo aan ka badneyn 100 ama 150 qof, hadana guno loo kordhiyay ma jirto oo lagaranayo, laba sub-head oo kaliya ayay lacagtaa xadigaa leh ku korodhey oo ah gurmadka deg-dega, gurmadka ciidanka oo labaduba ku jira budgetkii W. Arrimaha Gudaha, Wasaarada Mataxtooyada hadana mar sadexaad halkan lagu soo celiyay, sub-headkaasi wuxuu u eegyahay dhaqaalihii wadanka oo aan danihii iyo adeegii qarankani lahaa aan lagu fulinayn.

Wasaarada mataxtooyada 27 qof baa ka shaqeeya, 3 agaasime waaxeed baa u qoran mana jiro isuduwe gobol kaliya u jooga, gawaadhideeduna 3 gaadhi kama badna, lacagta noocaas ah waxa loo isticmaalayo lagaran mayo, halkan waxaa lagu qoray faah-faahinteedii mushaharka shaqaaleheeda waa **1,774,000,000** sl.sh ah, dee 27 shaqaalaha baa ku qoran lacagta intaa le'eg maxay ahayd ha la isweydiiyo qofkii ma 20 kun oo dollar buu qaataa, dalkeena waanu ka warhaynaa shaqaale la'aanta ka taagan dalkeena, waxaa la yaaba iyadoo habeen iyo maalin dadkii shaqo la'aan la ildaran yihiin in malaayiin lacag lagu soo qoro shaqaale, ma cadda waa in la is kor taago oo wasaaradu

soo cadeysaa waxay lacagtaasi ku baxayso iyo shaqaalaha ku qoran halkay ka shaqeeyaan.

Waxaa muuqaneysa waxaa iyo waxa ku qoran markeynu hoos ugu daadegno, waxaa cad in lacagtaa W. Madaxtooyada ku qoran la dhaafiyay tankeedii, qarankana dhiig bax ku ah, lunsi hantiyeedna aanu ka madhneyn, waxaa ka mid ah hay'ada abaabul ka saarka oo agoomihii iyo naafadii qaranka lagu ururiyay, hadana habeen iyo maalin cabashadooda iyo qeyladooda aynu maqalno, tirada naafada dhabta ah ee wadanka ka jirta ma hayno, inta wax qaadata ma ogin, maaha in indhaha la inagu qabto naafadaa la siiyaa, intaa in ka badan xaq bay u leeyihiin laakiin waxaa loo bahanyahay inta tirade naafada wadanka kajira la ogaado iyo inta wax gaadhaan, lacagtaasi waa ka badnaan lahayd oo xataa waxay u gaadhi lahayd in dhismayaal loogu dhiso, waa indho sarcaad qaranka lagu idho sarcaadinayo, waxbana ayna ka jirin.

Waxaa kale oo ka mida TVga qaranka oo **15,591 billion sl sh** ayaa ku qoran yihiin, waa la yaab, hay'ad madax banaan oo golayaashani ansixiyay maaha, sharcigu wuxuu ahaa inay wasaarada warfaafinta hoos tagto, waxay ka kharash badan tahay oo kaliya ugu yaraan 3 wasaarood oo wax soo saar oo ah Wasaarada Kaluumeysiga, Beeraha iyo Xanaanada Xoolaha, hadana maaha Tv tayo leh oo bulshadu ku qanacsantahay, una baahan in shuruuc iyo xeerar lagu maamulo laga soo saaro.

Waxaa ka mida iyana wasaarada Warfaafinta oo 10,118 billion sl.sh ah u qoran yihiin shaqaaleheeduna dhinac ka raranyahay, iyada laftarkeedu tayo malaha, qaabkey u shaqeyso laguma shaqeyso, dhexdhexaad maaha, barnaamijyadii looga baahnaa ma baahiso, shaqaalaha ka shaqeeya waad aragtey dayac ka muuqda, markaa yaa qaata lacagta, maanay ahayn in la soo baadho sidey ku baxdo.

Intaa markaan ka gudbo, mudanayaal, Mudane Gudoomiye, Wasaaradaas iyo hay'addahaas aan sharciga waa faqsanayn qarankana ku ah dhiig bax, isla markaana waxaa uu muujinayaa korodhka miisaaniyada lagu faanayaa faanayaa uu ku dhacay gacmo aan loogu talagalin oo lacagtaas lagu lunsado, sidaa darted waxaan soo jeedinaya in baadhis rasmiya laga sameeyo oo Gudiddi musuq maasuquna dabagal rasmiya ay ku sameeyaan.

Mudane Gudoomiye iyo mudanayaal, waxaan halkan idiinku muujinayaa dakhliga faraha-badan ee halkan ku muujisan ee aan lahayn qaab loo raaco kharashkeeda iyo sida uu baxayo, waana arin u baahan in aynu is dul taagno

oo cadeyno madawga foosha xun ee ka muuqda halkaas, dakhliga ka muuqda miisaaniyada 2014ka ee kharashkoodii ka muuqan halkan ku soo ururiyay iyadoo kooban:-

Kharashka Miisaaniyada Dawladaha hoose malaha breakdown A, B,C, way soo xereeyaane maxay qaataan ama side loogu celiyaa lama cadeyn, degmooyinka A ah sida Caasimada ah laguma cadeyn waxay ka helaan Miisaaniyad, ma mushahar bay u qaataan oo loo siiyaa ma si kalaa u qaataan kuwaasina kuma cada Miisaaniyadan, waa 129.836 billion sl.sh ah, waa kharash rikoodh jabisa, hadii si iyadoo mashaariiceysan la soo galin lahaa miisaaniyada wax badan bay ka tari lahayd, laakiin lacagaas waa lagu haf-rayaa, lama siiyo mana gaadho dawladaha hoose.

Waxaa ka mida kharashaadkaa, kharashka sanduuq horumarinta Somaliland (SDF), oo gaadhaya **81,000 billion sl.sh** ah una dhigma $13.500 Million, waxaa iska kaashada Denmarik iyo UK oo qaranka u deeqa, mana cada sida loo isticmaalayo iyo mashruuc ay ku baxayso, waa waxyaabaha la yaabka leh ee muujinaya in jeebado qarsoon uu kharashkaasi ku dhaco.

Kharashka kabka dawladaha Hoose oo **24.000 billion sl.sh** ah malaha breakdown isna, markaa ma cada sidey u qaataan dawladaha hoose ee dalku lama garanayo, waxaa kaloo ka mid ah kharashka Waddooyinka ee aynu ansixinay maalintii dhoweyd oo ah **24.000 billion sl.sh**, waddoyinka lagu sameynayaa waa kuwee, waddada lagu sameynayo in la cadeeyo oo breakdown lagu sameeyo oo la yidhaahdo 10km intaas ayaa lagu dhisayaa, waayo waxaynu haynaa hadalkii Wasiirka Madaxtooyada ee uu yidhi $15.5 per Mter$^2$ baa lagu dhisayaa, markaa maxaynu ku garaneynaa in lagu dhisayo.

Waxa kale oo halkan ku qoran kharashka Gobolada bari ee 2% oo 10 sano mudo gaadheysa la qaadayay cid maamusha iyo cid qaadata ma cada, xataa maamulkeeda cidda leh kuma jirto waa **24.333 billion sl.sh,** lacag yar maaha, hadii la mashaariiceyn lahaa wax badan Gobolada bariga u qaban lahayd 10kaa sano, waxaa ka mida kharashka Haamaha Shidaalka berbera oo iyana qaabkey u baxdo aanay cadeyn markaa looga eryaayey TOTAL miyaa laga kacsanayay, sow tii lala lahaa waa musuqmaasuq iyo tuugo, sharcigu wuxuu ina siinayaa inaynu ilaalino hantida qaranka iyo sida loo isticmaalo, markaa side loo isticmaala kharshka Haamaha shidaalka ka soo hoyda.

Mudanayaal, Mudane Gudoomiye, Miisaaniyada waxaa ku jirta Hay'addo badan oo aan la sharciyayn taas oo ka hor imanaysa dastuurka dalka,

Xeerarka maaliyadeed ee dalka iyo hanaanka maamul ee aynu dooneyno inaynu bulshada caalamka ku soo jiidano iyo deeq bixiyayaashaba, tusaale ahaan waxaa ka mida khasnada Guud ee Qaranka oo aan ahayn hay'ad sharciya, waxaa kaloo ka mida Gudidda dib u-habeynta sharciga maaha hay'ad sharciya, waxaa ka mida TVga qaranka, ICT, Hay'adda Xidhiidhka Raashinka la garan mayo, komishanka qurba jooga dalka oo waxay dalka ku soo kordhiyeen aan la garanayn, waxaa ka mida komishank dhowrista tayada, waxaa kaloo ka mida Gudidda Diiwaangalinta Ururada oo wakhtigoodii 2 sano dhacey kuna ekaa septembertii sanadkan, dhamaan kuwaasi waa laga saaro Miisaaniyada ama la sharciyeeyo, xataa kharashkaa ku badan oo aan gaadhin inta badani.

Mudane Gudoomiye, waxaa halkan ku cad Korodh shaqaale iyo ciidan oo aad badan oo gaadhaya 47 Kun oo qof, Miisaaniyada 2014ka waxaa lagu cadeeyay shaqaale gaadhaya 47 kun, waxay ahayd inaynu helno xisaab xidhkii 2012kii si aynu u ogaan tiradii actualka ahayd ee Shaqaalaha ciidamada, hadaynu se dib ugu noqono xisaab xidhka aynu hayno 2009ka waxaa ku cadaa tirade ciidanka iyo shaqaaluhu gaadhayeen 32 kun oo qof, waxaa u dhexeeya faraq dhan 15 kun oo qof la garan mayo goorta la shaqaaleeyay iyo sida loo shaqaaleeyay iyo hay'addaha laga kala shaqaaleyay, Waxaa kale oo jira caaglayn ciidamada Qaaranka, Bilayska, Asluubta oo dhamaantood u shaqeeya cida maamusha oo ay sida ay doonaan u isticmaalaan.

Waxaan tusaale u soo qaadanayaa tirada Shaqaalaha dawlada dhexe iyo ciidamada qalabka sida iyo Shaqaalaha aan joogtada ahayn break down lagu sameeyo , waxa kale oo Goluhu u baahan yahay marka uu miisaaniyadan oo kale ansixinayo in duuduub ku ansixiyo maahee Shaqaalaha dawlada dhexe oo Grade leh san, wasaaradaysan , Gobolaysan, oo Degmasan, waa inay ka muuqataa.

Tirada Ciidanka, tirada Bilayska, tirade Asluunta, tirada ciidanka Bada, tirade ciidanka ilaalada madaxtooyada dhamaan darajooyinkooda iyo Shaqaalaha aan joogtada ahayn iyo Grade kooda, iyo dhamaan tirada naafooyinka ciidamada itaas oo dhan waxaan u baahanahay in break down lagu sameeyo si aan u xalaalayno cadkaa loo qoray uuna ahaado mid xalaal.

Mudane Gudoomiye iyo mudanayaalba si ay misaaniyadu u noqoto mid ka turjumaysa baahida dhabta ah ee jirta dalka waa in lacagahaa sida foosha xun loogu dultuushay ama loogu qarsaday hay'adaha gaarka ah iyo wasaaradahaa waa in laga soo raraa inaga oo isticmaalayna awooda Goluha sida Qodobka 53

ee sheegaya in ay Golaha wakiiladu awood u leeyahay iskuna rari karo miisaaniyada ayna u soo raraan meelaha ay u arkaan in ay mihiim u tahay arintaana inaga oo ka fiirsanayna aan eegno Mashaariicaha uu dalkani u baahan yahay ku wooda ugu mihiimsana yihiin inaga oo eegayna sida ay u sii kala mihiimsan yahay oo aynaan markaliya wada dabooli Karin hadana waxaan soo qaadan lahaa:-

**Xoolaha:-**

- Soo celinta iyo hirgalinta seerayaasha 6 Gobolada iyo Degmooyinka dalka loona sameeyo mobile team ka shaqeeya gobolada iyo dagmooyinka dalka.

**Beeraha :-**

- samaynta xeerarka Beeraha iyo siyaasada horumarinta wax-soosaarka beeraha ee dalka
- Dayactirka iyo tayaynta Wasaaradaha Beeraha ee heer Gobol/Degmo sida dhismaha xafiisyada iyo tayaynta Shaqaalaha, gaadiidka Cagafyada, hirgalinta tijaabada iyo xarumaha Kaydka ee abuurka iyo abuur badinta.

**Kaluumaysiga:-**

- Abuurista iyo hirgalinta xarumaha Barafka dhaliya ( cold chain systems ) iyo gaadiid ka qaboojiyayaasha ee degmooyinka Berbara, Saylac, Lughaya, Maydh, Shalcaw iyo laasqoray.

**Deegaanka:-**

- Samaynta xeerka ilaalinta Deegaanka iy siyaasada guud ee lagu ilaalinayo Deegaanka dhinacyada Bada iyo Barigaba.
- Dib u soo celinta iyo hirgalinta seerayaasha keymaha Qaranka, sida Libaaxlay, Gacanlibaax, Wagar, Daalo, Calmadaw.
- Aas-aasida Beerta illaalinta xayawaanka Duur-joogta ah iyo dhaqan galinta siyaasada Qaranka Gaar ahaan kuwa sii dabar go’aya.

Waxaa kale oo aan ka hadlayaa ashaariicda kor loogu qaadayo Adeegyada bulshada oo ay ka mid yihiin:-

**Biyaha:-**

- Kordhinta iyo wax soosaarka xarunta Xunbaweyne , dhigista tuunbooyinka biyaha keena,dhismaha laba barkadood oo kayd biyood ah oo cusub lagana dhiso Bariga iyo koonfurta Caasimada Hargeisa.
- Qodista iyo hirgalinta 12 ceel oo ku yaala 12 dagmood/tuulo loona qaybiyay lixda gobol ee wadanka oo dhan si siman

**Waxbarashada Technical institute:-**

- Dayactirka iyo balaadhinta iyo hirgalinta dugsiyadii farsamada gacanta ee dayaxa iyo burco iyo haday hargaysa tahayba oo la soo saaro dad tayo leh.

- Taakulayn jaamacada dawlada ee Ceeri-gaabo Laas-caanood, Badhan, Buro, iyo Barbara iyo kuwo aan lahayn dhaqaale ku filan ee ku yaala dagmooyinka iyo gobolada dalka.

**Caafimaadka :-**

- lix-cusbitaal guud oo ku yaala Degmooinka Saylac, Gabiley, Sheekh, Odweyne, Laascaanood, Ceerigaabo.
- Taakulaynta jaamacadaha lagu barto Cilmiga dhakhtarnimada, iyo xirfadaha dhakhtarnimada gaar ahaan ku dhaqaale ku filan aan lahayn ee ku yaala degmooyinka iyo degmooyinka .

**Madaaradda:-**

- Dayactirka balaadhinta iyo dhismaha maadaarka Ceerigaabo iyo laas-caanood.
- Dayactirka balaadhinta iyo hirgalinta dhismaha maadaarka Laascaanood.

**Mashaariicda kor loogu qaadayo Shaqaalaha iyo dhalinyaradda:-**

- Shaqaalaynta 4000/3000 kun oo qof oo ka mid ah dhalinyarada ka qalinjabisay jaamacadaha Dawlada oo dhamaan laga shaqo galiyo dhamaan wasaaradaha, ciidamada kala duwan iyo hay'adaha Dawlada ee maxdaxa banaan.
- Shaqaalaynta 500 boqol oo qof dhalinyarada ka qalinjabisay jaamacadaha Dawlada, lagana shaqo galiyo dhamaan dawlada hoose ee dagmooyinka Heerka 1aad iyo 2aad (A&B).

Mudane Gudoomiye iyo mudanayaal miisaaniyadu waa in ay noqoto mid ka turjunta baahida dhabta ah ee jirta, waayo waxaan tusaale ahaan u soo qaadanayaa wasaaradaha qaar kood oo aan is barbardhig ku sameeyay

Wasaarada madaxtooyada miisaaniyadeeda waxaa ku qoran **50 bilyan** oo aan la garanayn sobob loo isticmaalo halka Beeraha ay ku qorantahay **3 milyan oo kaliya** isla markaana ahayd ta dhabta ah ee u baahan in ay qaadato **50 bilyan**halka ay **Wasaarada maaliyadu** ay ku qoran tahay **49 bilyan** iyo dheeraad, waxaana iyana qaawan oo barbartaala **Wasaarada Reermiyiga** oo lafdhabaarta xoolaha dalkeena ah iyana waxaa kale oo aan tusaale u soo qaadan karnaa **wasaarada Warfaafinta** oo iyana oo ay lacag korodh aad u badani ka muuqdo halka ay ka qatan tahay **wasaarada Kaluumaysiga iyo khayraadka baduna ay tahay Zero,** kuwaas oo dhami waxay sheegayaan in tahay waxyaabo aad u foolxun oo lalanayaabo.

Waxaa kale oo aan tusaale u soo qaadan karaa Wasaarada biyaha iyo TVga Qaranka oo an kuwa isa soo eegaya oo aadna u kala fog oo ah halka kharashka intaa le'eg ee lagu qoray TVga qaranka lagu qoro Biyaha oo dalka, biyo lagaadh siiyo oo noloshii ah waxa kale oo jirta lacagta ku qoran **Khasnada Dawlada iyo nala'aanta haysata iyo mugdiga ka muuqata** magaalooyinka dalka waxyaabahaa aan soo sheegay oo dhami waa waxyaabo la is barbar dhigi karo oo aan layaabo oo qalqaloocbadanina ka muuqdo markaad eegto taas oo waajibkeenu yahay in aan ka badalno meelahaa oo aan ku badalno meelaha ubaahan ee ay baahiyuhu ka muuqdaan.

Mudanayaal miyaanay ceel ahay in ay qaawan yihiin wasaaradihii loo baahnaa ee wax soo saarka iyo horumarkuba oo aad arkaysaan qaar aan loo baahnayna aad loo tuulay mudane gudoomiye iyo mudanayaal hay'adahay madaxabanaan ee dalku waa hanti qaran sida Dakada Barbara markaad eegto buuga labaad ee miisaaniyada waxaa ka muuqda hay'ado madax banaan oo wax soo dakhligoodii iyo kharash koodii ayaa is leekaaday oo aan lagaranayn meel ay ku baxeen kharashkaasi oo layidhaa kaliya way is leekaadeen kharashkii iyo dakhligii waana ayaan daro midaasi oo aan qaranka iyo hay'adahaa wax allaale wax loo qabtay aanay jirin.

Waxaa kale oo jirta safarkii dhawayd ee uu Madaxweynuhu uu ku tagay dakada Barbera oo la yidhi waxaa la siiyay agab, agabkaa ayaan darada jirtay waxaa ka mid ahaa qalan ay Dawladii siyaad bare kaga tagtay meesha oo dib ranji loosoo mariyay oo uu xadhiga ka jaray waana mid ceeba waxaan aloo

bahan yahay in wax yaabahaa oo dhan laga dhiidhiyo waxna aan ka qabano waayo waxaa layidhi waxyaabihii ka soo baxay Dakada ayaa laga soo ii biyay.

Waxaan misaaniyada ku soodarilahaa

1. In miisaaniyada lagu kordhiyay mushaharka Shaqaalaha 20% in laga dhigo 40% waayo miciishadii, guryihii , Gadiidkii ay raacayeen ayaa ku qaaliyawday iyagana.
2. 2% in la mashaariiceeyo oo aynaan garanayn cida qaadata iyo meelaha ay ku baxdo.
3. Waxaa kale oo aan soo jeedin lahaa in hay'adaha aan dakhligooda iyo kharash koodu aanu is leekayn dib loogu noqdo oo la hagaajiyo shuruucna loo sameeyo sida Dakada, Madbacada Qaranka, laydhla iyo biyaha hadaanay wax soo saar lahayn waa in lagu wareejiyo shirkadaha gaarka loo leeyahay oo malaaliyiin dollar laga qaado ayaa haboon waxaanan leeyahay go'aan kaasi hanoqdo mid gole.
4. Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa hay'aha halka ku qoran in misaaniyadooda la hayki ee uu ka mid yahay TVga qaran ilaa inta la ansixinaya waxaan soo jeedin lahaa in misaaniyada la goboleeyo/degmeeyo oo aanka dayno duduubkan aan ku wadno ayaan soo jin lahaa.
5. Lacaga hay'adaha iyo wasaaradaha la dultuulay laga soo qaado oo la keeno meelaha u baahan ee aan soo sheegay oo dhan si da caafimaadka, biyaha, wax soo saarka beeraha, deegaanak, dekadaha, kaluumaysiga, madaarada,

Mudane gudoomiye iyo mudanayaa xil ayaa inaga saran Qaranka hadaynaan wax ka qabana meesha ayaa la inoogu imanayaa markaa waa in aan wax ka qabanaa arimahaa aan soo sheegay oodhan waad mahadsantihiin mudane gudoomiye iyo mudanayaalba.

12. **Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** Mudanayaal iyo mudane gudoomiye dhamaan waad salaamantihiin, miisaaniyadu waa sharci aan ka doodno waxna iska waydiino mudanayaal waxaanayy ila tahay in ay tahay xaq Distooriya oo aan leenahay in aytahay anuu dooda badin maayo ee waan soo koobayaa.

Markaa maadaama aya tahay xaqdistooriya waan in aan eegnaa kaliya miisaaniyadu matahay mid ka turjumaysa baahida dhabta ah ee dalku uu qabo, markaa anuu waxaan is dultaagayaa halqodon waayo waxaan nahay

mudanayaal ka soo kala jeeda deegaamo hadana waxaan nahay mudanayaal Qaran anuu qodobka aan marwalba tabayaa ee ka maqan misaaniyada waxaa uu yahay xafiiska Wasaarada maaliyada eek u yaalaama Caasimadu waa in uu ka shaqaysiiyaa oo uu maamulaa xafiisyada Gobolada iyo dagmooyinka, hadaad eegto duruuftaasi hada waa midtaala oo mashaqeeyaan xafiisyadaasi dhamaantood baahida ugu badan ee haysataana waa mid dhaqaale oo xafiiskaasi u shaqayn laaya'ay dhawaqa marwalba soo yeedhaya ee taaganina waa baahidaa dhaqaale waayo mararbadan ayaan soo maray goboladaha dalka.

Tusale, ahaan burco mar aan joognay waxaan xisaabinay misaaniyada soo gaadha oo maalintii waxay noqotay maalintii $ 80 dollar markaa waxaan is waydiinay maqaduu ka dhigan ma shidaal ayuu ku shuban oo meel qalo dhaani uga timid ayuu ku tagi arinkaa halkaa ka muuqdaa in uu yahay gaabka halkaa taagani uu yahay dhaqaale la aan waxa kale oo aan eegnay wasaarada Caafimaadka ee hargaysa waxaa uu noo sheegay in uu qaato shidaalka oo kaliya 5 litter oo anay hayn mid ku filan waa isu duwaha oo kaliy.

Markaa, marka aan la siyaasadayn ee aan eegno baahiyaha jira waxay u baahan tahay in laga eego meelahaa mihiimka ah waxana soo jeedin lahaa in wasiirada qaar aan u yeedhno oo aan wax ka waydiino kharashaadka ku baxa xafiiskiisa iyo in break dawn lagu sameeyo misaaniyada wasaaradiisa waayo sida aan sheegay markaan maraynay meelaha qaar waan ku arkaynay wasaarda maaliyada markaan waydiinay in uu soo gaadhaan kharashaad kaasi waxaa uu noo sheegay in uu mushaharku oo kaliyaatii uu 3 biloodba mar soo gaadho ayuu noo sheegay.

Waxaa kale oo inaga qabyo ah xeerka miisaaniyada oo qeexi lahaa sida loo gaadhsiinayo Gobolada iyo dagmooyinka waxyaabahan oo dhanmi waana in aan samaynaa resource dhaaqale mar hadii uu mihiim u yahay wadan keena waayo laba wasaaradood ayaa ku shaqo leh xoolaha dalkeena waana wasaarada Xanaanada Xoolaha iyo Horumarinta Reermiyiga maadaama uu yahay resource ka kaliya ee aan haysanaa yahay Xoolaha nool waa waajib in aan ilaalinaa waayo waa takaliya ee 70% ay tahay wax soo saarkeena waayo marmar ayaa waxaad arkaysaa team dhakhaatiir ah oo daawaynaya gobolada Gaaq waxaanay u baahan yihiin labadaa wasaaradood in aan loo xoojiyo lana taakuleeyo, waxaa kale oo jira xaalufka deegaanuna waad ka war haysaan maanta meesha uu marayo waayo **laba qodob ayaa haysata dadka midi waa Dhinaatada deegaanka lagu hayo midina waa ta caafimaad**waana gobolada

fog ee dalka waana in ay labadaa wasaaradood ee waa in muhiimad gaara la siiyaa wanan ku celcelinayaa arintaa.

Mar aan eegno wasaarada daakhiliga waxaa ku qoran 27 milyan waan ta aan u baahanahay in ay maamushaa oo ka shaqaysiisaa dalka gudihiisa anigana waa ay ila yartahay 27 milyan marka aan ka rabno in ay ilaaliso abniga iyo waxyaabo badan oo kale way ku yartahay ayaa leeyahay mana haboona in ay is leekaadaan Wasaarada Madaxyooyada iyo Wasaarada Dakhiligu aniga ilama Haboona in kastoo aanan ku xeel dheerayn arimaha dhaqaalaha.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- Waxaan soo jeedin lahaa in aan aad uga baaraandagno miisaaniyada run ahaantiina waan u mahad naqaya wasiirka oo keenay xili hore oo kaga baaraan dagno waayo waxaan haysaan ilaa sadex bilood oo danbe.

- Waxaa kale oo aan soo jeedin lahaa in hay'adaha aan sharciga ahay eek u jira miisaaniyada in ay shaqaaluhu mar horaba qaateen mushaharooyinkooda oo aynaan si dhibyar ku jari Karin markaliya lakiin waxay haystaan ilaa sadex bilood ayaan qabaa waana in ay mudadaa ku soo gudbiyaan sharciyadooda maadaama aan nahay hay'ado sharci

13. **Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** Waxaan aad iyo aad ugu mahad naqayaa ilaahay ka sakow wasiirka wasaarada maaliya waxaan kala ee aan mahad gaara u naqayaa Gudoomiyaha Gudidda dhaqaalaha oo soo diyaaariayay warbixin waafiaya waxaan odhan lahaa iyo siyaadaba waxaa yidhi xil dhibaan Ibraahim Mahdi Buubaa oo aan dhamaan kalmadihii uu yidhi sidii uu uyidhi aan ku waafaqsanahay.

Miisaaniyada sidii uu sheegay waxaan ka hadli doonaa Afarmeelood oo aan is dultaagidoono:-

**Hay'adaha madaxa banaan iyo miisaaniyada loo qoondeeyay** hay'adaha aan sharciga ahayn wasaaradaha wax soo saarka leh iyo sida loo ilaaway iyo misaaniyada marka hore waxaan ku horaynayaa miisaaniyada sidii ragii horaba sheegeen waxaan leeyahay khasnada Dawlada waxaa lagu qabanayo wasiirna inooma sheegin Gudoomiyana inooma sheegin report misaaniyad ku jiraana ma sheegin waana lacag aan wax lagu qabanayaa ayaanay jirin oo aanan anuu ku qanacsanayn anan garanayn wax ay tahay khasnada guud barigii hore waxaa la odhan jiray treasure, treasure iyadaaa bank ahayd sub

Accounts ka ayaa lacagaha oo dhan jiri jiray waxaana lagu qaban jiray Vote ka dalka oo dhan ayay hayn jirtay.

Waxaa imika jooga xisaabiyaha guud oo hawshaa la wareegay, khasnadaa Guud ee Qaranku waxaanad moodaa in hawshii central Bank qabanayso waana hay'add aan sharci ahayn oo aan jirin oo hadana lacagta lacag ugu badan la duldhigay.

Wasaarada Wadaxtooyada qorshani waxaa uu siiyay 7 milyan oo Dollar Wasaarada maaliyada 8 milayan oo Dollar Abaabul kasaarka 5.5 bilyan oo Dollar lacaegahaa oo dhan hadii la isu geeyo waa 52 milyan oo Dollar waxay la mid tahay 34% misaaniyada dhamaanteedba waxaana hadhay oo kaliya 100 milyan, barigii hore waxaa la odhan jiray Md Dahir riyaale waxaa uu Misaaniyada lunsaday 50 milyan dollar markaa waxaan leeyahay waa isu mid run ahaantii waxaan ka sheekaynaynaana waa tii uunbay la midtahay iyada oo ay sidaastahay, bal waxaan eegaynaa sidii hore loogu sheeqay wasaaradaha aan leenahay waxbay soo saarayaan waa Wasaarada Beeraha waxaa weeyi 564 kun dollar waana ta aan karabno in wax soo saarto midhahan daadanaya mar ay soo baxaan oo aan cidi war u hayn inay dawayso oo ay keento sancooyin lagu barto ay keento ayaa waxaa la siiayay lacagtaa aan soo sheegay waana qaladwayn oo dhacaya sida aan umaamuli hayn waxan yar ee aan haysano.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Marka ay ugu yartahay 3 milyan wax ka yar uma qalanto Wasaarada Beeruhu iyo Wasaarada Kaluumaysiga oo laxoojiyo oo loona sameeyo Talaajadahaa la sheegayo oo waxyaabaha Badeena ku jira ee laxadayo si loo ilaaliyo oo milixdeenana Barbara iyo Toqoshiba oo qaadkan habeen walba Half million aan dirayno aan wax ku badalano waxaa la kaluumaysiga loo qoondeeyay 430 kun oo dollar 3 million wax ka yar uma qalanto Wasaarada Degaanka 740 kun oo dollar markaa maxaan doonaynaa in aan ku joojino dhuxusha in la joojiyo iyo xaalufinta deegaanka oo aan ku badbaadino bulshada iyo xoolaha reemiyiga oo la sameeyo wixii la odhan jiray foorstariga oo lixda gobolba lageeyo 100 qof oo ilaaliya sidaa aan soo sheegay waa in 3 million ayna ka yaraan.
- 2% gobolada bariguna waxaa in ay mashaariic ahaan ku gashaa. Waxaa kale oo aad eegtaan Wasaarada Diinta iyo Awqaafta 570 kun oo dollar ayaa loo qoondeeyay waxaana looga baahan yahay in ayqabato dhaqankii suubanaa in ay soo celisaa oo dhalin yarada maanta ee

tahriibaysa ama la dagaalamaysa askarta habeenkii ama xashiishad ha cabo oo dhamaantood way wada waasheen oo noloshii ayaa ka qaldantay oo hadii lacag wanaan san la siin lahaa ama loo qoondaynlahaa masaajidada Lixda Gobolna camiri lahayd markaa waxaan odhan laa in la siiyo 3 milayan si ay hawshooda u qansadaan.

- Waxaan u imanayaa Hay'ada waxaama ka mid ah Dakada Barbera oo ah hay'ad madax banaan oo marka ay xisaab xidhka samynayaa ta ugu ladan ay tahay oo aad moodo in asi muhani ama provision an ay wax soo gudbiyaan wakaalada dekadu 2 bilyan ayay siin jirtay dawlada 2009 – 2010 kii oo miisaaniyada ugu jirtay 2011 1 milyan ayay ku soo celisay 2012 -2012 way ka jartay lakiin macaash ayay samaynaysay 11 bilyan ah waxayna ku celisay dekada oo waa capital expenditure si ay wax ugu iibsato ama waxyaabaha ka gabooba ay ku dayactirtaan, waxaa kale oo ay ahayd in ay depreciation samayso sanad walba oo wax yaabaha ka xumaada ugu hagaajisato waxanan leeyahay hay'adahaa madaxa banaan ama la private gareeyo waayo waxay leeyihiin Genaral manager oo ilaalinayo in ay khasaraan waayo lacagtii umada ayaa ku lumaysa sidan waayo hadii privet laga dhigay way dadaalayaan ayaan qabaa hadii kalana ninka jooga meesha ayaa wax isk qor qoraya oo stamen ama report soo qoraya isagaa og.

Tusaale ahaan hadaan soo qaadano hay'ada korontadu waa tii kici gaadhay sanadkii dhaway ee uu uodit ku ku jiray 30 habeen, ee la yidhi way kacday, waana musuqmaasuq iyo dayn soo noqon wayday wax la kaantarooli karana maahan maamul wanaagsanan malahan waxaana soo jeedinayaa in privet laga dhigo ama la iibiyo ama lagu wareejiyo tijaarta wadan waayo tii dawladu way fashilantay kuwa privet ka ahina waxay sameeyaan maacaash weyn oo aan ogahay.

Aan la tartano public ga ama aan public ka dhigno ama dowladii dib haloogu cilyo waxaana leeyahay hadey suura gasho gudida dhaqaalahu oo uu hogaaminayo maxamed gudoomiyuhu waa in baadhis wey ugu noqadaan dabeedna ay go'aan ka soo gaadhaan in privet iyo in dawlada dib ugu celiyaa lakiin sidan ay maanta ku yihiin malaha hay'adahan budget meesha loogu daray ee aan sharcigaba haysan.

Waxaan la qabaa in la hakiyo miisaaniyada inta ay keenayaan sharciyadooda 3 bilood ayay heystaa intaan misaaniyadan intaan loo fasaxin waa in ay

keeenaan shaciyadoodii sanadkii horana waa ay ku jireen meesha waxaan leeyahah baarlamaanku inakoo aanan xumeyneynin ninaba waa in aynu mowqif midaysan ka sameysano waxbeynu hagijineynaa in ay keenaan sharcigooda hadayna keenina la fariisiyo oo aan lacag la siin waxaan kaga baxayaa ku soo gaba gabaynayaa lacagahaa aan sheegay ee ibraahin iyo nin waliba sheegay ee faraha badan leh ee mid waliba uu dul saran yahay ee kamid tahay qasnada qaranku ay ka mid tahay w.maaliyadu w. madaxtooyada ha"ada abaabul ka saarka ciidamada ilaalada madaxtooyada tvga qaranka iyo w.warfaafinta oo 52 milion oo dollar alokeshinkooda uu yahay in shantaa wasaaradood ee aan sheegay wax looga jaf jafo oo xagaa loo gudbiyo ayaan ku soo gababeenayaa .

14. **Md. Cali X. Maxamed Muuse:-** Xildhibaanadii iga horeyay ayaa aad u sharaxay dhaliilaha miisaaniyadan leedahay

Waxaan leeyahey waxa weeye wasaaradaha aadka looga Hadley kuwa miisaaniyadu ku yartahay iyo kuwa ay ku badan tahay ku noqonmaayo magacyadoode waxaan leeyahay ha laga gooyo oo ha loo raro kuwa ay ku yartahay, Wasaarada deegaanka aynu wax badan ku darno oo si deegaanka wax loogaga qabto Shaqaaleysiinta in iyagana la kordhiyo, Waxaa jira hay'addo dakhligii iyo kharashkoodii aan la isasoo garab dhigin oo

- ✓ Waxaynu u baahanahay lacagtaas faraha badan ee meelaha qaarkood ku badan inaynu ku shaqaaleyno dhalinta tahriibeysa oo ilaa 5000 oo shaqaale oo ayaynu shaqaaleysiin kareynaa, waxaan kaloo leeyahay ha la isu miisaamo miisaaniyada oo meelaha ay ku badan tahay ha laga soo jaro oo meelaha u baahan ee ay ku yartahay ha lagu daro,
- ✓ Waxaan kaloo leeyahay hay'adaha aan sharciga ahayn miisaaniyadooda la hakiyo ilaa inta laga sharciyeynayo oo ay ka keenayaa sharciyadood.
- ✓ Korodhka mushaharka Shaqaalaha iyo Ciidamada waxaan leeyahay halaga dhigo 40% kuma filna 20% loo kordhiyaye.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- ✓ Marka la saxo waxyaabahaa aan soo sheegay ee lagu daro Ha la ansaxiyo, waad mahadsantihiin.

15. **Md. Ibraahim Jaamac Cali Reyte:-**Runtii ka hadalka Miisaaniyadanu waxyaabaha iigu adag inaan ka hadlo intii aan Golaha joogay, sababtu waa iyadoo u baahan in mudada aan haysto mudo ka dheer ama ka badan in laga hadlo oo aynu haysano, iyada oo jahawareersan marka run ahaan erayga sidiisa aan u qaado oo hadii meesha jahawareer jiro waxaa adkaanaysa in jahadii loo socday la helo, waxaan soo jeedin lahaa Mudane Gudoomiye Golaha aan usoo jeedin lahaa aduunyadu miisaaniyadaha sanad dhan ayay ka shaqeeyaan marka miisaaniyadan la keeno wasaarada maaliyadu ama xafiiska budget ku inuu hada bilaabo weeye miisaaniyadii kale siday u badan tahayna guddiyada dhaqaalaha ee baarlamaanadu markaas bay la bilaabaan oo la jaanqaadaan/

Markaa baarlamaanku min bilowgeedii ilaa dhamaadkedii involved bay yihiinoo way la socdaan sida miisaaniyada loo diyaargareeyey ta labaad baarlamaanadu waxay helaan wakhti aad u fara badan oo ay miisaaniyada kaga baaraandagaan waxaa inoo caado ah baarlamaankeena in miisaaniyada aynu iyadoo ay dabada wax ka eryayaan aynu is dhaafino xilka ugu muhiimsan ee mesha aynu u joognaana waa miisaaniyada waxaan soo jeedin lahaa in priority laga dhigo xeerkii miisaaniyada oo ah waajib dirtoori ah oo ku qeexan distoorkeena oo aanay ahayn inaynu miisaniyad ansixino ilaa xeerarkaa noocaasa diyaarino.

Talabaad in mudanayaasha la siiyo wakhti ku filan miisaaniyada mudo dheerbaa laga shaqaynayay waa figures analysis bay u baahan yihiin accuracy bay u baahan yihiin inaad waxyaabo information faro badan inaad heshid bay u baahan yihiin xildhibaanadu wakhti ku filan oo aan bil ka yarayn in miisaaniyadaha lafagurkeda iyo falanqaynteena inaynu u qoondayno wakhtigena waayo waa howlaha ugu muhiimsan ee uu golehenu leeyahay mudane gudoomiye waxaan jeclahay inaan Golaha u sheego miisaaniyadan horta maaha wax goleheena ku eeg iyo somliland miisaaniyadu sideedaba waxay muujisaa intension ka ama ujeedada dhabta ah ee dowlada, dowladu waxay doonto haku hadasho statement kay doonto ha sii dayso laakiin waxaa dhab ah oo ka run ah waxay halkaa ku qoroto taasaa muujinaysa ujeedadda dhabta ama naturka ka dhabta ah ee ay dowladu leedahay,

Haday dawladu tidhaa waxaan la dagaalamaynaa curroptionka inay miisaaniyada ka muuqato weeye hadii miisaaniyadu u qorshaytan tahay qaab fududaynaya cporruptionkii micneheedu waxaa weeye hadalkii dowladu ama xukuumadaasi sheegtay ee ahaa corruption kaa waa diidanahay ama waan la

dagaalamaynaa waxba kama jiraan tanaa ka markhaati noqonaysa hadii xukuumadu tidhaahdo horumarka dalka waxaan culayska saaraynaa hayadaha wax soo saarka xanaanada xoolaha, waxbarashada kaluumaysiga.

Waxaa ka marag kacaya taa waxay taasu leedahay marka lagu arko wasaaradii xanaanada xoolaha oo saddex bilyan u qoran tahay 4 bilyan u qoran tahay wasaaradii beeraha saddex bilyan u qoran tahay TVga qaranka oo 15 bilyan u qoran tahay waxaa la leeyahay oo caqliga saliimka ahi leeyahay waxaad sheegayseen sax maaha halkaa xooga ma saraysaan marka ay arkaan 17 bilyan oo ilaalada madaxtooyada ku qoran waxaa hada buuqeedu socday oo aad la socoteen oo ay xukuumadu beryahanba waday wadooyinbaanu dhisaynaa oo ay waliba culayska saarayeen wadada ceerigaabo iyo burco isku xidha oo dhowr boqol oo kilometer ah hadii dowlada ay ka dhab tahay maxay miisaaniyada ugu soo dari wayday meeday wixii nalugaga dagaalamayay meeye halkan inay ka muuqato weeye in dowladu commited tahay oo ku tahay waxay ku muujin lahayd oo ay ka muuqan lahayd miisaaniyada.

Waxaan xukuumada iyo  xildhibaanadaba xasuusinayaa miisaaniyadaa aynu soo saarnay ama ay xukuumadu keentay ama aynu ansixinayno aduun waynuhu ama caalamka kale way eegayaan way anaylsis garaynayaan miisaaniyadaha waa la furfuraa ujeedooyinkooda rasmiga ah ayaa laga soo saaraa laga dheegtaa miisaaniyadaa waxaan leeyahay sawir xun oo khaldan ayay caalamka inaga gudbinaysaa intaas guud ahaan waa miisaaniyada.

waxaan doonayaa inaan dhowr meelood oo muhiima is kor taago, horta miisaaniyadan waxaa weye waxaynu halkan ku qaybinaynaa cashuurihii dadka laga soo uririyey oo inagu ka midnahay oo qofkasta oo muwaadina oo reer somalilanda laga qaaday, cashuurahaa waxaynu u qaybinaynaa adeegyo ay tahay in bulshada dadkii laga qaaday oo ay tahay in dib loogu caliyo oo dowladu ugu caliso oo ay u baahan yihiin.

Adeegyadaa waxaa ka mida waxbarashada amniga caafimaadka horumarka kale ee guud iyo wixii la mida, waxaa inagu waajib ah markaynu ansixinayno misaniyada waxay u eegtahay sidii adigoo boqol caagadood ku kala shubaya foosto biyo ah hadii caagadahaa aad ku shubaysaa qaar ay gun laayihiin maaha inaad ku shubto caagadahaa gunta la waayo biyahaad ku shubtay waa khasaare caagadahaa gunta la waxaa ka mida hayadaha aan sharciga ahayn waajibkenu waxaa weye marka la samaynayo waa xeerkii hayadahaas maamulkeedii board of directors keedii hab xisaabaadkeedii wexeedii oo dhan dabadeedna waxaa la siiyaa hayada marka la samaynayo.

Hay'adda marka la samaynayo waxay u baahan tahay sharci iyo recourse si ay adeegaa bulshadu u baahan tahay u fuliso hadii aynu recourcse siino khaliya laakiin sharci aynaan siin resource ka halka aad ku shubtay waa recourse khasaaroobay oo aan la xisaabtan lahayn waxay ahayd in hayadahaas aan in sharcigoodii la keeni ka hor intaan miisaaniyada lagu soo darin  waxaan qabaa in miisaaniyada lagu soo daro hayad aan sharci waajibin oo aan xaq u lahayn inay lacagtii publicga spend garayso inaanay marka hore sax ahayn, wasiirka maaliyadaa arintaa dhanka sharciga way ka yara hoostay waanu jecelnahay maanta ka bacdi hayad aan sharci ahayn oo aan sharci jidayn inaanu miisaaniyada kusoo darin waxaan leeyahay hayadahaas xaq uma lihin hadaynu Baarlamaanka nahay inaynu lacagta umada u sii dayno hay'addii laga maarmi waayo ee loo arko inay bulshada muhiin u yihiin oo hawlo lagaga maarmaana ay fulinayaan siyaasadii ay ku salaysnayd iyo sharcigii ay ku salaysnayd ha la keeno oo Goluhu ha ka doodo ha la isku waafaqo budget markaa ha loo sameeyo.

Hay'adaas runtii maaha kuwo aan anuu kaligay qabo xildhibaanadii iga horeyey way wada sheegeen warbixintii guddiga dhaqaaluhu way ku jiraan oo way soo jediyeen hayadaa waxaa ka mida garyaqaanka guud anigu runtii waan ka reebayaa inkastoo uu u baahan yahay xeer gaara hadana xeerku already wuu mension gareeyey oo uu tilmaamay wuxuu ku jiraa xeer kale wuxuuse u baahan yahay xeer faahfaahsan oo kala xadaynaya hawlaha isaga iyo xeer ilaalinta guud oo cadaynaya meesha niddaamka garsoorka uu kaga jiro oo si fiican u qeexaya ayaa loo baahan yahay laakiin waxaan qabaa hayadaas inay tahay hayad loo baahan yahay xeerkuna uu runtii tilmaamay laakiin guddida dib u habaynta shuruucdu maaha guddi jira in loo baahan yahay iyo in kale in la isla garto weey Goluhu ka doodo weeye hadii la samaynayo xeer lagu sameeyo weeye, ICT commission.

Hay'adda xidhiidhka raashina runtii wax saxa maaha, raashinka qaranka maxaa looga jeeda hadii loo jeedo macaawinooyinka kaalmada raashinka ee dibadda inooga imaada hay'ad uma baahna ee qof co'ordinate gareeya ayay u baahan yahay. waxayna tahay wasaarad dhan oo dib u-dajinta la yidhaado ayaa jirta waanan filayaa in uu jiro agaasin dhan oo u qaabilsan, waxaa kaloo jiray hay'ad Madaxtooyada ka mid ahayd oo sidaan filayo hada la hoos geeyey wasaarada dib u-dajinta u qaabilsanayd macaaniyooyinka waxaan leeyahay baahideedu maba jirto waana fool xun halkan inaynu hayad ugu samaysano wax qarankenu istaahilo maaha hayada qurbo joogu waa maxay wax lagu qoslo.

Wax la yidhaa hay'ad qurbo jog wax jira maaha, hadii la doonayo commuiteega somaliand ee qurbaha ku nool wasaarada arimaha dibadu waax u gaara oo qaabilsan la xidhiidhka dadka reer Somaliland ee qurbaha ku nool haloo sameeyo waax ay wacyi galin iyo wixii ay u baahan yihiin u qabata halo sameeyo ama danaha ay uga baahan yihiin dalka u qabata laakiin hayad la idhaa qurbo joogu wax la idhaa ma jirto, qurbo jooguna meelkaliya kuma noola yurub bay ku nool yihiin yemen bay ku nool yihiin wadamo farabadan bay ku nool yihiin wax mideeyaa ma jiro.

Hayada dhowrista tayada waan qabaa in loo baahan yahay wadankan tayo xuma ayaa taala haday dawada tahay haday qalabka tahay haday raashinka tahay haday wax walba tahay waa la inagu soo dum gareeyaa wax aan tayo lahayn cid inaga controlsha oo awood leh oo lacag badan loo qoondeeyo waan qabaa laakiin sharcigeedii cidii ka shaqayn lahayd iyo qualification keedii la keeno baan qabaa.

TVga qaranka wax meel taagan maaha wasaarada warfaafintu waa saddex waa TVga iyo Radio ga iyo wargeyska oo runtii aan u arko redundant in aan loo baahnayn waayo dhowr iyo toban wargeys oo private ah ayaa jira oo halkan press ku waa xor mar hadii press k uxor yahay aduunyada freedom of speech ku jiro dowladu joornaalo ma soo saarto dowladu radiyowyo mayeelato dowladu waxay adeegsataa mediahaa public ah ee private ka ah culays ayuu ku yahay marka horeba ayaan qabaa TVga qaranka waxaan qabaa in uu ka mid yahay qayb ka mid ah.

Waxaase laakiin marka intaas laga imaado foolxumo ah Tvyo private ah TVga qaranka lacag Wasaarada Beeraha, Wasaarada Xanaanada Xoolaha, Wasaarada Kaluumaysiga iyo Wasaarada Deegaanka, afartaa Wasaaradood oo ka mida 4 ta ee ugu muhiimsan dhanka wax soo saarka marka la isku geeyo TVga Qarankaa ka badan xisaabiya calculate caqligii miyuu inaga lumay cable kiibaa jira, universalbaa jira, Tvyo faro badan oo dalkan laga daawado oo dalkeena ka shaqeeya ayaa jira, ma waxaa soo kharasha ayaa ku baxa TVyadaa privateka ah kuma baxaan haday ku baxaan waxaasoo kharasha waa laba miduun intaas ku baxday ayay soo saaraan oo way faaidaan Tvga qarankuna wuu faa'idaa mana hayno ama intaasi kuma baxdo waxaan leeyahay waxyaaba qaarkood waa laga xishoodaa wasaarada warfaafintu kama muhiimsana wasaarada beerha , wasaarada xanaanada xoolaha.

Wasaarada Deegaanka iyo Wasaarada kaluumaysiga siday uga lacag badataa, waxaa ay qabato waynu ognahay waa radio, TVgii waa laga saaray anaa run

garayn kara radio hadii la ii ogolaado waa la diidaybaaba la yidhiye inkastooy constitution tahay oo aan xaq u leeyahay anaa run garayn kara radio waxaasoo lacaga inay ku baxdo wasaarada warfaafinta wasaaradihii aasaasiga ahina ay qatan yihiin dee taasi waxay leedahay series ma tihidin hadaydun sidaa ku ansixino dadkiinan reer Somaliland aduunyadu waxay ina leedahay waad iska ciyaaraysaan.

Waa ogtihiin inta mashaakil ina haysata ee lacag u baahan, waxaa lacag u baahan tacliintii, inkastoo miisaaniyadan marka loo eego wasaaradihii kale ay ka fiicantahay, hadana labanlaabked u baahan waayo waxay abuuraysaa waa wasaaradaa mustaqbalkii umadan oo dhan ay saran tahay waxaa lacag u baahan dhalinayrada jaamacadaha kasoo baxay ee ciidaa ka badan oo lacayowga meelahaa ku jiraa hadii la isu geygeyno aan ku qiyaasay ilaa 5000 oo dhalinyaro lagu shaqaalayn karo hadii waxaa aynu sheegaynaa ay run yihiin waxaan isdul taagayaa oo ka mida caagadihii gunta lahaa ee aan shegayay ee biyaha lagu shubaa sii daynayay waxaa halkan miisaaniyada ku qoran oo loogu magac daray khasnada dowlada oo malaha kaydka qaranka ayaa loo jeeday khasnada dowlada haday tahay waxaan qabaa horta dowlada baanka dhexe ayaa khasnad u ah khasnada dowladana lacag uunbaa la dhigtaaye kharash kuma baxo boqol iyo shan iyo lixdan bilyan ayaa ku qoran wasaaradaha oo dhan isu geeya inta ku baxday miyay noqoyaan boqol iyo shan iyo lixdan bilyan waa maya macquul maaha sub-head ayaa intaas ku baxayaan

Anigu waxaan leeyahay waxa laleeyahay khasnada dawlada miisaaniyadeedii hore ee ay lahayd ayaa ciirciiraysa oo u baahan in dibloogu noqdo waayo lacagteedu waa165 milyan accountability malahan oo wasiir saxeeya malahan sharci allaale sharci ay leedahayna malahan, maadaama ayna lahayn sharci waa in lagu daraa wasaaradaha u baahan, waxaa waliba ku dheeraadka ah ee aan aadka u layaabay waa tigidhada mana garanayo waxa ay yihiin waana tigidhada waraaqaha ayaa lagu dhajiyaa wasaaradaha iyo hay'adaha ayaa is ticmaalo waa lacag dadku ay bixiyaan miisaaniyada kuma jirto hadii aan seegayna waad ii sheegi kartaan ninka iga indho fiiqani, waxaa kale oo ku jira baasaaboorada Somaliland oo aan hore udaabacnay hadana waa yaalaan arinkaa foolxumaa ku jirta miyay dhamaadeen oo imisa qof ayaa qaata anuu laba qof ayaan u qaaday oo aan lacagta bixiyay baantka ayaana iibiya waxaana iibiya baanka markaa dee inuu baanku iibiyo maahee waa in uu iibiyo imigirayshanku waana in uu yeeshaa raseedh waayo rashiidh malaha

miisaaniyada meel ay ka soo galo ma jirto ama ku  ma jiro markaa waxaan leeyahay in lagu wareejiyo imigirayshanka.

Waxaa kale oo ka mid ah daynta Qaranka, wax dayn layidhaa majiraan waayo world bank aan wax soo amaahanay ma jiraan ama IMF ku siiso ama Dawlad kale ku soo amaahiso lacag si aad hub ugu iibsato, markaa ma jiraan wax aan soo amaahanay waayo cid ina aaminaysaa majiraan ama dawlado wax ina amaahinayaa dawn la inagu leeyahayna ma jirto waana subhead aan jiran gudoomiye waxan leeyahay halaga qaado oo halugu daro meelaha u baahan ee aan soo sheegay.

Waxaa kale oo jira Document mana fahmaayo waxaa loo jeedo run ahaantii hadii looga jeedo tigidhadii way jiraan aduunyada way jiraan lacago kolna kor u kaca oo khasnnada, anuu waxaan qabaa in lacadeeyo wax yaabahaas oo dhami.

Daabacaada lacagtuna miyay soconayasaa mar walba waan soo bacanay waxaa ka horeeya in go’aan laga gaadho oo Golaha la horkeeno oo ay ansixiyaan, waayo Golahaa xaq u leh inuu ansixiyo, baanka dhexena Xoghayn ayuu inooga yahay Hawlaha soconaya iyo baahiyaha loo qabo lacagtaa, mana wanaagsana in lacag la iska soo daabacdo golahan oo aanu ogayn waana in go’aanku ka horeeyaa, Wasaarada maaliyaduna waa in ay soo saarto oo ay qaybisaa, waxaa kale oo ay ka shaqaysaa in ay ururiso lacagaha waxaa kale oo meesha ku jira guno maaliyadeed waxamay guno maaliyadeed, waayo gunada shaqaaluhu waa ay ku jirtaan iyo shaqooyinka dheeraadka ahiba intuba way ku jiraan oo hadii Shaqaalaha loo qaybiyo waxay noqonaysaa lacag xad dhaaf ah waana in ay cadahay waxyaaba ay ku baxayso.

Waxaa kale oo aan rabaa in aan is tultaago laba arimood oo kal ah

1. **Biilasha taagan**

Hadaba waamaxay biiltaagan waayo wasaarad kastaa waxay leedahay budget iyadaana soo qoratay sida ay wax u baxayaan iyo kharashaad keeda run ahaantiina maanfahmin biiltaagan wax loola jeedo, awoodna uma lahan in ay isticmaalaan wax ka baxsan misaaniyadooda distoorkana sicad ayay ugu qoran tahay in aanay isticmaali Karin wax ka badan intaa loo qoondeeyay. Waxanan leeyahay waana dabi in uu wasiirku uu dhaafo cududii loo qoondeeyay mana aha in baanku sii amaahiyo lacag waayo qaar ayaa ku qoran baanka ayaan adhfaas kaga qaadyanay arinkaasina waa danbi.waayo lacagtaa uu ka qaatay sadexda bilood eedanbe ayuu ku bixinayaa amana aha biiltaan

waayo may dhamaan miisaaniyadiisii waxaanan mudane gudoomiye soo jeedinayaa in la xaaraantinimeeyo biilasaha taagan oo dhan miisaaniyada dabana lagu soo dirin

2. **lacagaha lama filaanka ah**

Waxaad is weydiisaa hadii ay kuu taalo lacag lama filaanihi sidee ayaad u keenaysaa biiltaagan oo marka ay wax dhacaan lagu qaban lahaa maxaa biilkan tagay waan in aanu taagmin lacagta lami filaanka ahina waa in ay ku hadhaaa khasnada dawlada waayo waxyaabaha lama filaaankii waa sida Daadad, amaandaro iyo waxyaabo kale ayaan odhan karnaa lama filaan waana wax nolosha caadiga ah ka baxsan , hadii ay dhacana waa in aan haysaanaa wax aan kaga hortagno waay waa arin aad u wanaagsan, lakiin lacagtaasi waa in ay khasnada dawlada si toos ah ugu dhacdaa oo aanay wasiir iyo cidkale toona gacanta loo galin oo hadii la siticmaali waayo waaa in ay soo raacdaa misaaniyada danbe.

Mudane Gudoomiye, marka aan lacaga bixinayno waa in aan ku bixinaa meelaha looga baahan yahay Wasaarada maxadaxtooyadana waxaa ku qoran lacag aad u badan hadii aad eegto ciidanka ilaalada madaxtooyada iyo waxaa isku mid ah Golaha wakiilada ee umadani soo dooratay markaa ma maan galbaa anuu waxaan qabaa in dalka ay ilaaliyaan Ciidamada Qaranka.

Ciidmada Asluubta, sirdoonka Qaranka ayaa ilaaliya dalka balse maxaa laga ilaalinayaa madaxtooyada waa qof naftiisa difaaca ilamana aha in 17 bilyan ay qaataan, hadaba waa maxay Wasaarada shaqadeedu waa Xoghaynta Madax tooyada maadaama ay waxaas oo la cagii galayaan waa in la keenaa sharci sheegaya hawlaha ay qabanayso oaan muujino ayaan qabaa, lacagtaa aan sheegayo kuma jirto lacagta Qasriga madax tooyadu.

Mudane gudoomiya lacagtaa dhar iyo tobanka bilyan ah waxaa dheer budget kii Qasriga madax tooyada iyo Madaxweyne ku xigeenka waxaana dheer lacagayaw farabadan oo ku jira kaydka qaran oo hoos imanaya Wasaarada madaxtooyada oo ay ka mid yihiin 2% ku halkaa ayay ku soo shubmaysaa markaa waxaan leeyahay arintaa hadaynu ogolaano xilkii umada aan u haynay way wiiqaysaa waxna way u dhimaysaa waanan ogolnahay in cidkasta oo xil loo dhiibaan in ay helaan wax ku filan ay hesho waxanan leeyahay mugii ay lahayd Wasaaradu way dhaaftay waxaan leeyahay dib haloogu noqdo oo meelaha u baadan halahu daro oo dhalin yarada halagu shaqaalaysiiyo Wasaarada beeraha, Wasaarada kaluumaysiga,

Mudane gudoomiye, waxaa inta badan xukuumadu ka hadashaa waa Horumarinta waayo waxaan leenahay bada ugu dheer oo kaluun ka buuxo waxaana gurta ajanabi oo xada waayo dhawaan barnaamij aan daawaday oo taylan ah waxay ka kaluumaystaan wabiyada waxaana ka soo baxa sanadkii 3 milyan markaa si aan ula soo baxno waa in aan investment galinaa Wasaarada kaluumaysiga iyo dadka bilaasahawada ah.

Waxaa kale oo aan doonayaa in aan dul istaago Wasaarada abaabul kasaarka anuu waxaan aaminsanahay in ay baa'baday mar hore waxaana u qoran lacag dhan 30 bilyan, wax aabulkasaarana oo wadanka ka socdana maan aran waxaa kale oo ku qoran musharka naafada, bilayska, ciidamada waana ay ku qoran yihiin in ay ku jiraan khasnada dawlada.

16. **Md. Ibraahim Axmed Reygal:-** Mudane Gudoomiye, Salaan ka bacdi, Miisaaniyada Jamhuuriyada Somaliland ee Sanadka 2014ka ee ina hortaal waxaan ku tilmaamayaa una rejeynayaa inay noqoto mid barakeysan, sababtoo ah:-

- ✓ Waxaa lagu daray kharashka lagu dhiirigalinayo xifdiga quraanka kariimka ah.
- ✓ Waxaa korodhsiimo loogu daray shaqaalaha iyo Ciidamada Dalka.
- ✓ Waxaa la tixgaliyay deegaanka iyo wax soosaarka Sida Wasaaradaha Kaluumeysiga, Beeraha iyo Xoolaha, iyo Nabadgalyada, maamulwanaaga iyo tan ugu weyn oo ah kaabayaasha sida Waddooyinka.

Mudane Gudoomiye waxaan soo jeedinayaa in meelaha soo socda aad iyo aad mudnaan iyo tixgalin gaar ah loo siiyo, qarankuna aad ugu baahanyahay in Miisaaniyadan wax looga dheego, gaar ahaan kharashaadka hawsha socota, kharashka gaadiidka iibsiga, meelaha aan soo jeedinayo in Misaaniyada wax looga dheego waxaa ka mid ah:-

- ✓ Deegaanka oo loo abuuro seerayaal (ragnes) iyo seera celiye (ranger) oo 13 gobol ee dalka midkiiba hal seere loo sameeyo, midkiiba loo qoro 5 seere celiye oo noqoneysa 13 gobol x 5 = 65 seereceliye, kuna kacaya sanadkii 65 x $100 US = $6500 bishiiba, sanadkiina noqoneysa $6500 x 12 = $78000, taasoo dhaqaalaha Xoolaha iyo xaalufka wax weyn ka qabaneysa.
- ✓ Maxaabiista mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal sida aad la socotaan miisaaniyaddii ugu horeysay ee Gole ahaan aynu ansixino maxaabiista wax yar ugu sharciyeynay ah 5000 maxbuus maalintii, hadaba in kastoo

wasiirka caddaaladu Golaha dhawaan ka sheegay inay hadda tahay 10,000 sl.sh/= maalintiiba halkii maxbuus, waxaana soo jeedinayaa in loo dheego 15,000 sl. Sh/= maalintiiba halkii maxbuus.

***Ugu dambeyn, waxaan soo jeedinayaa:-***

- In Miisaaniyadda Qaranka 2014ka sida Gudidda dhaqaaluhu u soo jeedisey loo ansixiyo, waad mahadsantihiin.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
-----------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
-----------------------------------------